



**GO'AAMINTA**  
**HEERKA IYO**  
**MUDNAANTA**  
**HAWEENKA**  
**ITOOBIYA**

**Warbixinta Daraasad**  
*[Kooban]*

*Oktoober 2024,  
Addis Ababa, Itoobiya*



የሴቶችና ማህበራዊ ጉዳይ ሚኒስቴር  
Ministry of Women and Social Affairs



Funded by  
the European Union



NEWA



OXFAM

**GO'AAMINTA**  
**HEERKA IYO**  
**MUDNAANTA**  
**HAWEENKA**  
**ITOOBIYA**

**Warbixinta**  
**Daraasad**  
*[Kooban]*

*Oktoober 2024,*  
*Addis Ababa,*  
*Itoobiya*

**MAALGALINITA MASHRUUCA**  
Midowga Yurub (EU)

**HOGGAANKA MASHRUUCA**  
Shabakadda Ururada Haweenka Itoobiya (NEWA), OXFAM Calamiga &  
Guddiga La-talinta ee Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada (MoWSA)

**QORAYAASHA**  
Ziade Hailu, Tilahun Girma, Kidist Gebresilasie, Daniel Nigatu, Tirsit Sahledingil

Photo credit: [https://www.flickr.com/photos/rod\\_waddington](https://www.flickr.com/photos/rod_waddington)

## KU SAABSAN Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada Ururka Haweenka Itoobiya (NEWA) & OXFAM

Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada (MoWSA) waa wasaarad heer federaali ah lana aasaasay iyada oo lagaduulayo xeerka lambarkisa yahay 1263/2014. Wasaaraddu waxay sii toos ah mas'uul ka tahay Arrimaha Haweenka, Carruurta, Dhallinyarada, iyo guud ahaan Arrimaha Bulshada ee Dadka Naafada ah, dadka waayeelka ah, dadka saboolka ah, iyo qaybaha nugal ee bulshada Itoobiya. Ururka Haweenka Itoobiya (NEWA) waa urur aan faa'iido doon aan ahayn, la aasaasay 2003 lagu aasaasay dumar isahaantood tashtay sii ay uu dhiisaan wada-shaqeyn iyo cod horumarineed oo xooggan oo ku saabsan horumarinta haweenka. Ururka Haweenka Itoobiya (NEWA) Waa urur ka mid ah shabakadaha ururada bulshada ee heer qaran ahna uruurka ugu weyn ee ka shaqeeya ilaalinta xuquuqda haaweenka guud ahaan dalka kuwaas oo ukalabaxa mid siyaasadeed, miid dhaqaale, miid bulsho iyo niidaamka sharciga ee haweenka. Sidoo kale, tan iyo bilowgii 1970 OXFAM waxay ka shaqaynaysay la-dagaalanka saboolnimada iyo faquuqa iyada oo xooga saareysa horumarinta noolal-maalmeedka, bixinta biyo iyo ilaalinta cafimaadka, beeraha, cilmi-baarista cimilada, jinsiga, iyo arrimaha xaquuqul insaaniga. NEWA iyo OXFAM waxay fuliyeen mashruuc cilmi-baaris iyaga oo la kaashanaya Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada. Midowga Yurub ayaa maalgaliyay daraasadka, waxaana taageero aan ka lagao lahayn ufiidiyay Guddiga La-talinta, oo ka kooban khubaro iyo dad u haadla sinnaanta-jinsiga

Macluumaad dheeraad ah, booqo:

[www.mowisa.gov.et](http://www.mowisa.gov.et)

[www.newaethiopia.org](http://www.newaethiopia.org)

[www.Oxfam.org](http://www.Oxfam.org)

# HORUMAR

Dowladda Itoobiya waxay tallaabooyin muugle ku talaawsatay abuurista jawi wanaagsan ku haboon hiirgaliinta sinnaanta jinsiga iyo kuubciinta tayada haweenka guudahan dalka, taasoo ka dhax muuqan karta hirgelinta istiiraatajyada siyaasada iyo istaraatiijiyada kala duwan oo lagu xallinayo diib u dhaca haweenka dalka iyo kaladuwanaasha udhaxeeya jiinsiga. Inkasta oo dadaala balaadhan la sameeyay, haddana aragtiida bulshada, dhaqamada soo jireenka ah ee faquuqa duumarka, iyo colaadaha kajiira deegaanada qaar waxay sababtay caqabado horumarinta kuubciinta tayada iyo tabarta haweenka. hooyoyinka iyo gabdhaha waxay wali la kulmaan dhiibaatoyin kala duwan oo ay keento colaadu kamiidtahay, dhiibaatoyinka so nooqnooda waxa kamid ah kufsi iyo dhiibaatoyin noocya kale oo kaladuwan. Inkastoo siyaasadaha qaranka ay sheegayan sida muugaleh ay dowladdu oga go'an tahay hiirgalinta awood siinta haweenka, waxaa wali jira baahi loo qabo xoog dhammaystiran oo sii dhameestiran faafaahiin kahaadli kara xaaladda haweenka, dalka gaar ahaan degaanada colaadaha kajiraan.

Dadaalladii hoore ee ururinta xoogta, inkasta oo ay waxtar lahaayeen, haddana waxay ahaayeen kuwo kala daadsan taasoo keentay faham aan isku xirnayn oo ku saabsan waayo-aragnimada haweenka. Maadaama ay ka maqnayd daraasad midaysan oo wax ka qabata dhinacyo kala duwan ee noolasha haweenka, arrimahan waxay caqabado ku noqdayn go'aan-qaadashada xoogta ku saleysan iyo faragelinta wax ku oolka ah. Markii la aqoonsaday farqigan, daraasaddan hadda socooda oo ka kooban Sahanka Haweenka Itoobiya, 2023 (SEW, 2023) iyo Daraasadda ku salaysan Ka-Qaybgalka bulshada (PAR) waxay noqotay dadaallada ugu waaweyn lasameeyo, iyada oo la adeegsanayo farsamooyin tayeysan oo tiro iyo tayaba xambaarsan si loo heelo xoog isku dhaf ah oo islama ahan casri ah. waxa la wareystay 36,367 haween ah oo ku kala sugan dhamaan degaanada dalka islama ahaanta waxa la sameeyay wadatashii kooxeed (WGDs) oo kala duwan, waxa lagu so saaray daraasadka miideysan oo dhammaystiran oo ku saabsan noolasha haweenka, siidokale buuxinaysa farqiga xoogta ee jirtay lagana faaiday nidaamya adag ee waayo-aragnimadooda wata.

Xoogta cusub ee laga ururshay daraasadkan waxa uu noqon doona il muhiim ah oo ay ka faa'iideysan karaan dadka ku hawlan dajinta iistiraajiyada siyaasadaha, dadka u dooda sinnaanta jinsiga, warbaahinta, iyo cilmi-baariis. Hoogaaminta Siyaasada waxay adeegsan karaan natiijooyinka ka so baxaay daraasaadka si ay u dajiiyaan nidaam siyaasaded oo xog dhab ah ku salaysan, halka dadka u dooda sinnaanta jinsiga ay ku duuli karaan xogtan sida ay kor ugu qaadi lahaayeen wacyiga iyo isbeddelka siyaasadeed. quuburada warbaahintu waxay ku muujin karaan arrimaha muhiimka ah, taasoo kor u qaadaysa doodaha bulshada iyo isla xisaabtanka, halka aqoonyahannadu ay abuurin karaan aqoon cusub iyaga oo adeegsanaya qalabyo tirakoob oo caasirisan.

Guud ahaan, soo saarista warbixinta daraasaadka waxay muujineysaa sida ay oga go'an tahay Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada, Midowga Yurub (EU), OXFAM, iyo NEWA fahamka iyo wax ka qabashada caqabadaha kala duwan ee ay hoortaagan haweenka Itoobiya. Maalgelinta ay ku bixiyeen daraasaadka waxay muujinaysaa aragtidooda guud ee ah in la qaabeeyo mustaqbalka haweenka oo kudhehan cadaalad oo loogu talagalay haweenka Itoobiya

## Ururka Haweenka Itoobiya (NEWA) & OXFAM

# MAHADNAQ

Hirgelinta guusha leh ee daraasadda ku saabsan Xaaladda iyo Mudnaanta Haweenka Itoobiya (EWSP) waxa suurtagal kadhiigay ka qeyb qaadashada shakhsiyaad iyo hay'ado badan kaladuwan. Waxaan si qoto dheer ugu mahadnaqeynaa Midowga Yurub (EU) taageeraha aan kala goa lahayn miid dhaqaale ee deeqsinimada wata, taas oo suurtagal ka dhigay daraasaadka. iyo Dadaalkooda ku aaddan koor uqaadida awooda haweenka dalka Itoobiya iyo horumarinta sinnaanta jinsiga waa mid aan la qiyaasi karin oo si weyn loo qadarinayo.

Waxa sidoo kale loo mahad naqayaa Guddiga La-talinta aay hoggaaminayso Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada (MoWSA), ku haagaysay aqoon, iyo galiyay dadaalo aan kalagoo lahayn aay u hureen waqtiiga uu mashruucan soocday. Waxaan siidokale xusayna taageerayaasha faraha badan ee laga helay xafiisyada Haweenka iyo Arrimaha Bulshada ee deegaanada, magaalooyinka iyo degmooyinka. Waxaa sidoo kale wada shaqeyn wanaagsan kaheelnay Ururada Xuquuqda Haweenka, Ururada iyo qaab-dhismeedyada kuwaas oo laga heelay dadaal dheerad ah kana qayb qaatay ka qeyb galay wadatashiiga bulshada fagaaraha (PAR).

Mahad gaar ah mudan qorayaasha Ziade Hailu, Tilahun Girma, Kidist Gebresilasie, Daniel Nigatu iyo Tirsit Sahledingil; maareeyaha xoog uruuriinta iyo barnaamijiyaha Girum Getachew iyo kormeeraha tayada, Amanuel Kiros. Waxa xuusid gaar ah mudan maareeyaha sahanka ee ECON M. Consultants & ABAMELA Business Consulting mudan in la amaano qaabka ay isku dabariideen, taageerada farsamada, iyo dadaalkooda ku aaddan guusha sahankan iyo sidoo kale waxtarka cilmi-baarista tayada leh laga fuliyay PAR-da siddeed degaan. Ugu dambayn, waxaan si qoto dheer ugu mahadnaqaynaa ka qaybgalayaasha daraasadda ee sida wanaagsan galiyay waqtigooda, waayo-aragnimadooda, iyo aragtidooda.

Mashruucani ma suuragali ahayn haddii aysan jirin dadaalo wadajir ah iyo dadaalo gaar ah shakhsiyaadka iyo hay'adaha kor ku xusan. Wada shaqaynta lamaanayaasha ee horumarinta aqoonta iyo fahamka arrimaha haweenka Itoobiya waa mid mudan in si mug weyn loo qadariyo.


## Ururka Haweenka Itoobiya (NEWA) & OXFAM

# FURAYAASHA IYO SOO GAABIN

AIDS	Cudurka Immune-ka ee la helay (AIDS)
BGRS	Maamulka Gobolka Benishangul Gumuz
CBO	Ururada Ku Salaysan Bulshada
CSA	Hay'adda Tirakoobka Qaranka
DHS	Sahanka Tirada iyo Caafimaadka
DG	Kooxda Wada Hadalka
EA	Aagga Tirakoobka
ESS	Adeegga Tirakoobka Itoobiya
EU	Midowga Yurub
FCV	Daciifnimo, Khilaaf, iyo Rabshado
GBV	Xadgudubka Ku Salaysan Jinsiga
GGGI	Tusmada Caalamiga ah ee Fursadaha Jinsiga
HIV	Fayraska Jirka Difaaca (HIV)
ICT	Teknoolojiyada Macluumaadka iyo Isgaarsiinta
IDRC	Xarunta Cilmi-baarista Horumarinta Caalamiga ah
IFPRI	Machadka Caalamiga ah ee Siyaasadda Cuntada
IUD	Qalabka Ka-hortagga Ururka ee Gudaha (IUD)
LMS	Sahanka Shaqaalaha iyo Socdaalka
MSE	Ganacsiyada Yaryar iyo Dhexdhexaadka ah
NEWA	Shabakadda Ururka Haweenka Itoobiya
NGO	Urur aan Dowlad Ahayn
OXFAM	Guddi Oxford ah oo wax ka qabta Abaarta
PAR	Daraasadda Ka-Qaybgalka
PSNP	Barnaamijka Shabagga Badbaadinta Wax-soo-saarka/ Barnaamijka Badbaadada Wax-soo-saarka
SEW	Cinwaanka: Su'aalaha Haweenka Itoobiya
SHG	Koox Isku-kaashadeysan
SPSS	Xirmada Tirakoobka ee Cilmiga Bulshada
STATA	Software-ka Tirakoobka ee Sayniska Xogta
TV	Telefishinka
TVET	Tababarka iyo waxbarashada farsamada iyo xirfadda
WEAI	Tusmada Awood-siinta Haweenka ee Beeraha
WGD	Kooxda Wada-hadalka Haweenka
WG	Kooxda Haweenka

## GO'AAMINTA HEERKA IYO MUDNAANTA HAWEENKA ITOObIYA

HORUMAR.....	i
MAHADNAQ .....	ii
FURAYAASHA IYO SOO GAABIN .....	iii
<b>1. ASALKA .....</b>	<b>1</b>
1.1 HORDHAC.....	1
1.1.1 Guudmarka Daraasadda.....	1
1.1.2 Ujeedooyinka Daraasadda.....	2
1.1.3 Qaab-dhismeedka Warbixinta Daraasadda.....	2
1.2 Guudmar Habraaca .....	2
1.2.1 Habraaca Sahanka.....	2
1.2.2 Qaab-Daraaseedka Cilmi-Baarista Tayada .....	3
1.2.3 Isku-darka Habka Dhex-dhexaadka ah .....	4
1.2.4 Caqabadaha iyo Xaddidaadaha Daraasadda .....	4
1.2.5 Qaab-Dhismeedka Falanqaynta .....	5
<b>2. HORDHAC MUHIIMKA AH.....</b>	<b>6</b>
2.1 MAWAADIICDA NOLSHA HAWEENKA .....	6
2.1.1 Xaaladda Dhaqaale ee Haweenka .....	6
2.1.2 Xaaladda Caafimaadka Haweenka.....	8
2.1.3 Helitaanka Waxbarashada Haweenka .....	9
2.2 CAAQABADAHA IYO ADKEYNTA .....	10
2.2.1 Rabshadaha Jinsiga iyo Xadgudubka ku Saleysan Jinsiga .....	10
2.2.2 Fayoobi Maskaxeed iyo Hababka La-qabashada .....	10
2.2.3 Helitaanka Cadaaladda Haweenka.....	11
2.3 Himilooyinka iyo Awooda.....	11
2.3.1 Mudnaanta iyo Himilooyinka Haweenka .....	11
2.3.2 Siyaasadda iyo Ka Qaybqaadashada Bulshada .....	11
2.3.3 Xaaladda Nabadda iyo Amniga.....	12
<b>3. Gabagabo Iyo Talo Soo Jeedin .....</b>	<b>13</b>
3.1 Gabagabo .....	15
3.2 Talo soo Jeedin .....	17
<b>Tixraacyada.....</b>	<b>26</b>



# GO'AAMINTA HEERKA IYO MUDNAANTA HAWEENKA ITO OBIYA

## 1 Asalka

### 1.1 Hordhac

#### 1.1.1 Guudmarka Daraasadda

Dawladda Itoobiya (GoE) waxa si xooggan oga go'an hoormariinta iskudheeli tiriida jinsiga iyo koor u qaadida awooda haweenka. Hoormariinta iyo iskudheeli tiriida jinsiga iyo koor u qaadida awooda haweenka (GEWE) waxay ka mid tahay mudnaanta istiraajiyada hoormarineed ee her qaran ugu muhiimsan, waxayna ku jirtaa bartamaha istiraajiyada dhammaan barnaamijka siyaasadaha, sharciyada, iyo qaab-dhismeedyada hay'adaha.<sup>1</sup> Siyaasado badan, sharciyo, iyo istiraatiijiyado taageeraya haweenka ayaa la hirgeliyay si wax looga qabto sinaanta jinsiga. Jinsiga waxaa lagu daray qorshayaasha horumarinta qaran ee muhiimka ah iyo qorshayaal gaar ah oo ku saabsan qaybaha sida caafimaadka, waxbarashada, warshadaha, iyo wixii la mid ah. Intaa waxaa dheer, qaab-dhismeedyo hay'adeed ayaa la diyaariyay si loogu hagaajiyo lana kormeero sinnaanta jinsiga.

Inkasta oo ay jiraan siyaasado xooggan oo hoormarineed, istiraatiijiyoyin, iyo qorshayaal hawleedyo, dhaqamada jinsiga iyo colaadaha iyo rabshadaha ayaa caqabad ku noqday dadaallada hoormarinta awood-siinta haweenka. Hooyoyinka iyo gabdhaha wali waxay la kulmaan dhibaatooyin coolaadaha sookeeye keenaan sida kufsika oo sii muweeyn so nooqnoqda iyo mushkiiloyin noocyo kale ee haweenku unuuguliyihiin. In kasta oo siyaasadaha iyo qorshayaasha qaranka ay muujiyaan ballanqaad adag oo ku saabsan horumarinta sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenka, haddana waxaa aad u yar xogta dhamaystiran ee la heli karo ee ku saabsan xaaladda haweenka iyo mudnaantooda iyo dhibaatooyinka ay la kulmaan.

Dadaalladii hore ee lagu ururin jiray xogta ayaa ahaa kuwo waxtar leh laakiin kala daadsan oo xaddidan, taas oo keentay in si gooni-gooni ah loo fahmo dhinacyada kala duwan ee qaabaynaya waayo-aragnimada haweenka. Maqnaanshaha xog mideysan oo si dhammaystiran u sahmissa waayo-aragnimada haweenka ee dhinacyo kala duwan ayaa caqabad ku noqday heelidda xoog sax ah oo iskudheelitiran oo unooqda haalbeeg dhameystiran si go'amada laqaadanayo unooqdaan dhaxaalgal ku dheexanyihiin wax so qabad. Intaa waxaa dheer, qaar ka mid ah xoogaha waa kuwa waqtii hoore, taas oo muujinaysa baahida loo qabo xoog caasiriyeeysan oo joogto ah kana jawaabaysa xaaladaha cusub kana jawaabaysa xaaladda sii kordheysa ee awood-siinta

haweenka, gaar ahaan marka laga hadlayo deegaannada dhiibaatooyinka dagaaladu kajiraan. Intaa waxaa dheer, xoogaha laga so aruuriyo heerarka degmooyinka ayaa kooban balsa sii joogto ahaayi loo ururiyaa sahannada qaran, taas oo saameyn ku yeelanaysa saxnaanta ku dhaqmiida siyaasadda, iyada oo la muujinayo baahida loo qabo fahaan qootadheer ee xaaladaha heer deegaan.

warbixinta daraasadka ee ku saabsan Xaaladda iyo Mudnaanta Haweenka Itoobiya (EWSP) waxay soo koordhisay tallaabo weyn oo taariikhi ah ay kamiid yihiin faa'iidooyinka iin la isku uruuriyo kala baahsanaanta xoogta kusaabsisan haweenka, sahankan dhammaystiran waxa uu dadaal dbahaad weyn galiyay siidi lagu hagaajiin laha kala baahsanaanta xoogta iyo sii nidaamsan loo ururin karo xoogta baahsan iyo isku keenida xoog hoorleh oo haabaysan oo casriyeysan, iyada oo la adeegsanayo hab dhammaystiran, sahanku wuxuu soo ururiyay xog dhinacyo kala duwan ah, isagoo soo bandhigaya guudmar dhammaystiran oo ku saabsan noolasha haweenka iyadoo la adeegsanayo xog tiro iyo tayyo leh. Marka la eego dhowr dhinac, sahanku wuxuu aqoonsan yahay dabeecadda adag ee waayo-aragnimada haweenka. Sidan, waxqabadka daraasaddan waxa uu ku jiraa awoodda ay u leedahay in ay buuxiso farqiga xogta ee ku saabsan dhibaatooyinka iyo mudnaanta haweenka. Mashruucan weyn wuxuu ka mid yahay dadaalladii ugu waaweynaa ee ilaa hadda la qabtay lana waraystay 36,367 qof oo ku nool dhamaan deeganada wadankan itoobbia iyo laga qayb galiyay 440 haween sii ay oga wadahaadlaan iyaga oo koox koox ukala fadhiiya ka dhacaay 8 degaan. Xoogta cusub ee laga soo ururiyay daraasadka waxa uu noqon doonaa kheyraad muhiim ah ka faideeysanayan, khuuburada dajiiya istiraatiijiyada siyaasada, uruurada udooda siinaanta jinsiga, warbaahinta, iyo cilmi-baarayaasha. Khuuburada dajiiya siyaasadda waxay ka faa'iidayaan karaan natiijooyinka si ay u soo saaraan siyaasado ku salaysan xogta si loo horumariyo sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenka.

<sup>1</sup> Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya (2019), Warbixinta Shanaad ee Qaranka ee horumarka laga sameeyay Hirgelinta Baaqa Beijing iyo Madasha Waxqabadka (Beijing +25). Dukumintiga waxaa laga heli karaa: <https://shorturl.at/3J-SU3>

U doodeyaasha jinsiga waxay heli doonaan xog waxtar leh iyaga oo ku dadaalaya inay kor u qaadaan wacyiga, u ololeeyaan isbeddelada siyaasadda, iyo inay wadaan beddelka bulshada. Shaqaalaha warbaahinta waxay isticmaali karaan macluumaadka si ay u muujiyaan arrimaha muhiimka ah oo ay u wadaan doodaha dadweynaha, taasoo gacan ka geysanaysa kordhinta wacyiga iyo isla xisaabtanka. Cilmi-baarayaashu waxay xogtan ka dhalin karaan aqoon cusub iyagoo adeegsanaya aaladaha tirakoobka heerka sare ah.

Guud ahaan, hawlgalkani wuxuu caddeyn u yahay sida Wasaaradda Haweenka iyo Arrimaha Bulshada, Midowga Yurub (EU), OXFAM iyo NEWA ay uga go'an tahay fahamka caqabadaha kala duwan ee ay haweenku wajahaan iyaga oo maalgelinayo dhaqaale iyo waqti si loogu fuliyo hawlgalkaas muhiimka ah ee noqon kara aalad muhiim ah oo lagu qaabeeyo ama lagu wajaho mustaqbal cadaalad ku dheehan oo loogu talagalay haweenka Itoobiya.

### 1.1.2 Ujeedooyinka Daraasadka

Ujeeddada guud ee daraasaddan waa in la helo caddeymo dhammaystiran oo ku saabsan xaaladda haweenka iyo mudnaantooda dhinacyo kala duwan—dhaqaale, waxbarasho, caafimaad, aragtiida qaldan ee jinsiga iyo galmada ku saleysan, caafimaadka maskaxda, siyaasadda, madaniga, nabadda, amniga, iyo helitaanka caddaaladda—oo muhiim u ah haweenka

Tani waxay ku salaysan tahay xog tirakoob ah oo laga soo ururiyey qooyas ku yaal 12 degaan iyo 2 Maamul Magaalo oo daboolaya 119 gobol/magaalo/degmo magaalooyinka Itoobiya iyo xog tayo leh oo laga soo ururiyey 8 gobol iyada oo la adeegsanayo hababka PAR iyada oo kooxo haween ah la isku ururiyay. Isku darka xogahan, warbixintu waxay ujeeddadeedu tahay inay wax ku biiriso dadaallada awood-siinta haweenka iyada oo lagu hagayo siyaasado iyo barnaamijyo wax ka qabta dhinacyada muhiimka u ah hawl-karnimada haweenka.

### 1.1.3 Qaab-dhismeedka Warbixinta Daraasadka


Waxa lagu soo bandhigayaa Warbixintu guudmar ku saabsan daraasadda ku salaysan noolasha haweenka Itoobiya, iyadoo diiradda lagu saarayo tirakoobka, tilmaamayaasha dhaqaale, caafimaadka, waxbarashada, iyo adkeysiga. Waxa lagu falanqeynayaa inta ay la egyptahay baahada xadgudubyada jinsiga ku saleysan, caafimaadka maskaxeed ee haweenka, iyo heelitaanka suugiida caddaaladda. Warbixintu sidoo kale waxay sahmisaa rajada iyo doorka haweenka, oo ay ku jiraan dakhliga, rajada amniga, iyo ka qaybgalka siyaasadeed. Warbixintu waxa lagu soo jeedineysaa guunaanad iyo talooyin ku saabsan faragaliinta haboon ee siyaasadda iyo barnaamijyada.

## 1.2 Guudmar Habraaca

### 1.2.1 Habraaca Sahanka

Cinwaanka: Su'aalaha Haweenka Itoobiya (SEW) waxay adeegsatay naqshad muunad ururin ballaaran oo daboolaysa qooyas ay ku nool yihiin dad ka weyn da'da 15 sano ee magaalooyinka iyo miyiga Itoobiya, marka laga reebo meelaha aan amniga ahayn. Sahanku wuxuu adeegsaday muunad mataleysa oo ka kooban 36,330 qooyas oo laga soo xulay 1,211 aagag tirokoob (EAs) iyada oo la adeegsanayo qaab muunad oo ay diyaarisay Hay'adda Tirakoobka Qaranka Itoobiya (CSA) sanadkii 2018/19 Qaabkaas ayaa taxay 147,602 goobood oo leh faahfaahinta goobta iyo qiyaasta tirada qoysaska, iyadoo la adeegsanayo naqshad muunad saddex-geesood ah oo kala qayb ah si loo doorto.

Su'aalaha sahanka ayaa si taxadar leh loo soo diyaariyay si loo sahmiyo dhinacyo kala duwan oo awood-siinta haweenka, waxaana la casriyeeyay iyadoo la adeegsanayo kobotoolbox si xogta loo ururiyo si hufan. Sahanku wuxuu daboolay toddobo mowduuc, oo ay ka mid yihiin tilmaamayaasha dhaqaale, aragtiida qaldaq ee jinsiga ku salaysan, arrimaha maskaxda, suugida caddaaladda kushaqeeynta, mudnaanta haweenka, ka qaybgalka siyaasadda, iyo nabadda iyo amniga, iyadoo la sameeyay wareysiyo fool-ka-fool ah oo lala yeeshay dad ka weyn 15 sano si loo helo aragtiyadooda mowduucyadan. Shaqaalaysiinta shaqaalaha sahanka waxay ka koobnayd tababarida 160 ururiyayaal xogta, 30 kormeerayaal, iyo 5 isku-duwayaal oo ay tababareen khubaro khibrad leh, iyadoo la sameeyay tijaabo hordhac ah oo lagu xaqiijinayo waxtarka iyo kalsoonida su'aalaha sahanka.



Shaqada goobta ee sahanka waxay bilaabatay si dagdag ah ka dib tababarka loo fiidiyay xiirfadlayaasha kaladuwan, waxayna socotay laga bilaabo Oktoobar 3 ilaa Diseembar 1, 2023, iyadoo la daboolay 1233 aagag tirokoob, iyadoo la waraystay 36,990 qooyas ku yaal magaalooyinka iyo miyiga. Xogta waxaa lagu ururiyey wareysiyo fool-ka-fool ah iyadoo la adeegsanayo su'aalo qaabaysan, waxaana taageeray Microsoft dashboard si loo daba galo horumarka shaqada iyo kormeerka. Dabagalka xogta ka dib waxaa la sameeyay nadiifin dhammaystiran iyo adeegsiga barnaamijyada SPSS, STATA, iyo Excel si loo falanqeyo xogta, iyadoo qorshaha loo dejiyey abuurista jadwalka tirakoobka iyo jadwalka guud, garaaf yada, iyo sawirrada. Xogta laga helay wadahalada kooxaha haweenka waxaa loo tarjumay, loo kala soocay, lana soo koobay iyadoo la adeegsanayo falanqaynta maadada iyo mawduucyada si loo soo saaro warbixin dhammaystiran oo ku saabsan PAR.


### 1.2.2 Qaab-Daraaseedka Cilmi-baarista Tayada

Habka Cilmi-Baarista Falkan Qayb-galka (PAR) wuxuu adeegsanayay hab-dhismeed dhammaystiran oo iskaashi ah oo ku saabsan ururinta iyo falanqaynta xogta. Geedi-socodka PAR waxaa lagu fuliyay 8 degaan oo dhamaan dalka Itoobiya, iyada oo la sameeyay xarumo degaana oo looga duulo goobaha laga fuulinayo daraasadka ay ka koobnaayeen Kormeerayaasha Cilmi-Baarista Hogaaminaya, Saraakiisha Mashruuca, iyo wakiillo ka socda Ururada Xuquuqda Haweenka (WROs) laga bilaabo Sebtember 20, 2023 ilaa Diseembar 31, 2023.

Gobollada uu ka dhacay PAR, iyo degmooyinka, iyo kebelayaasha ku yaal gobolladaasi, waa sidatan

- Maamulka Magaalada Addis Ababa: Saddex qayb-magaalo iyo dagmooyin
- Degaanka Amxaarada: Magaalada Bahir Dar
- Gobolka Oromada: Metu, aagga Ilu Aba Bor, dagmooyin iyo kebelada Metu
- Degaanka Benishangul: Magaalada Assosa
- Degaanka Koofurta Itoobiya: Degmada Gamo Arba Minchi, dagmooyin iyo kebelada
- Degaanka Tigray: Mekelle, Hawuzen, iyo dagmooyin Hagereselam
- Degaanka Canfarta: Zone I, Samara, Logia, Dubt
- Degaanka Soomaalida: Aagga Fafan, woredada Babili, Awbare, iyo Tule Guled

### Gobollad PAR Laguqabtay



### 1.2.3 Isku-darka Habka Dhex-dhexaadka ah

Si loo soo saaro warbixinta hadda jirta, waxaa la adeegsaday habka cilmi-baarista dhex-dhexaadka ah (mixed methods research approach). Habkan ayaa la doortay maadaama uu leeyahay awood uu ku kala qaato cilmi-baarista tayada iyo tirakoobka labadaba isagoo yareynaya xaddidaadaha labada hab. Habkan wuxuu ka caawin karaa in la horumariyo faham dhammaystiran oo ku saabsan isbeddelada lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay in loo sameeyo kooxaha la takooray sida haweenka iyada oo la isku daro xogta tayada iyo tirakoobka labadaba.<sup>2</sup>

### 1.2.4 Challenges and Limitations of the Study

Daraasad lagu sameeyay heerka iyo mudnaanta haweenka Itoobiya waxay soo bandhigtay caqabado adag oo u baahday qorsheyn istiraatiiji ah iyo tallaabooyin la jaanqaadi kara duruufaha. Cilmi-baarista waxaa lagu sameeyay iyadoo qaar ka mid ah degaanaada ay ka jireen colaad, taasoo abuurtay jawi adag oo ku saabsan ururinta xogta. Meelaha kala fog ee ururinta xogta waxay keeneen caqabado dhinaca gaadiidka ah. Intaa waxaa dheer, degaanaada sida Soomaalida, xilliga roobka wuxuu sii xumeeyay dhibaatooyinka la xiriira dhaqdhaqaaqa, taasoo ku adkaysay shaqaalaha garoonka inay helaan goobo gaar ah. Intaa waxaa dheer, xaddidaada adeegga internet-ka ee degaanka Amxaarada ayaa qasab ka dhigtay ururiyayaasha xogta inay dib ugu laabtaan magaalooyinka waaweyn si ay xogta ugu soo diraan internetka, taasoo sababtay dib u dhac ku yimaada habka ururinta xogta. Sidoo kale, heelida haween ku filan oo ka qayb qaata uruurinta xogta kana hawlgala goobaha fog fog midaasna waxay keentay

caqabad joogta ah. Intii lagu jiray ururinta xogta Tayo-daran, Xaaladda Degdegga ah ee ka jirtay degaanka Amxaarada waxay sidoo kale xaddiday dhaqdhaqaaqa iyo lakuulanka bulshada. PAR waxaa lagu qabtay Bahir Dar, iyadoo ay ka qayb qaateen 20 haween ah.

Si loo xalliyo caqabadaha aan koor ku sheegnay, waxa laga faa'iidaystay dadaalka iyo khibrada ururiyayaal xoog oo horay ula shaqeeyay Adeegga Tirakoobka Itoobiya (ESS) iyo iyadoo laga fogaaday meelo gaar ah. Go'aanka istiraatiijiga ah ee looga fogaanayay goobaha colaadaha ka socda wuxuu faa'iidooyin badan u keenay cilmi-baarista: wuxuu yareeyay khatarahat ay lakuulmi lahaayen xoog-ururiyayaasha, wuxuu xaqiijiyay saxnaanta ururinta xogta, wuxuuna hoos u dhigay suurtagalnimada in daraasaddu ay muujiso dhacdo sannad gaar ah halkii ay ka noqon lahayd xog mataleysa oo guud. Habkan macnihiisu maaha in la iska indho-tiray goobaha colaadaha; taa beddelkeeda, waxaa lagu qabsaday dhinacyo muhiim ah oo ku dhex jiray qaybta PAR taasoo kobcisay cilmi-baarista.

Degaanaada hoos ku xusan ayaa laga saaray sahanka: laba gobol oo ku yaal Amxaarada (Koonfur Gondar iyo Bari Gojam), laba gobol oo ku yaal Tigraay (Galbeedka Tigraay iyo Koonfurta Tigraay), canfarta gobol oo ku yaal Oromada (Horo Gudru Wollega, Kelem Wollega, Mirab Wollega, iyo Bari Wollega). Sidoo kale, iyadoo loo marayo dabecadda kala firdhisan ee goobaha ururinta xogta, qaar ka mid ah Aagag Tirokoob oo adag in la gaaro ayaa lagu beddelay si loo fududeeyo saadka. Qorshe khataro ka hortag iyo yareyn ah oo adag ayaa la sameeyay si si firfircoon loo maareeyo caqabadaha aan la saadalinin iyo si loo xuujiyo guud ahaan adkeysiga howlgalka sahanka.

Jiiritaanka caqabadaha ka jira xaaladda colaadda iyo xaaladaha cimilada aan haboonayn waxay u baahan tahay in lagu xiisaabtamo oo lagu daro baabsiga ay ku keenayso daraasadka. Xaddidaadahan waxay sababi karaan ceehasho iyo buunbuunin aan loo bahaanayn dhinaca tiirakoobka, gaar ahaan meelaha sida tilmaamayaasha maskaxda, iyadoo lagu jiro saameynta xaaladaha jira, taasoo laga yaabo inay kor u qaadaan qodobbada xoogta qaarkood. Inkastoo la isku dayay in laga hortago saameyntan iyadoo la adeegsanayo ururiyayaasha xogta ee xirfadlayaasha ah, eexashada bulsheed (respondents conceal their true opinion to look good to others) ayaa wali door ka ciyaari karta, gaar ahaan su'aalaha nooca Likert. Sidaa darteed, fasiraad taxaddar leh oo gaar ah ayaa loo baahan yahay, iyada oo la tixgelinayo caqabadaha deegaanka ee saameeyay jawaabaha ka qaybgalayaasha. Sidoo kale, warbixintu waxay si weyn ugu tiirsan tahay soo bandhigida warbixinta dhibcaha boqolleyda. In kasta oo tani ay tahay hab-dhaqanka caadiga ah ee warbixinta sahanka, haddana dadka xiisaynaya ayaa sameyn kara falanqeyn qoto dheer iyagoo adeegsanaya habab tirakoob oo heer sare ah. Intaas waxaa sii dheer, dhinaca tayada ee daraasadda sidoo kale waxay isku dayday inay ka jawaabto qaar ka mid ah dhinacyada "siide" ee xogta tirakoobka, inkastoo xaddidaadaha dabiiciga ah ee daraasadda tayada iyo arrimaha wakiilnimada ay weli jiraan.

<sup>2</sup> John W. Creswell (2017). "Qaabaynta Cilmi-baarista: Hababka Tayada, Tiro-koobka, iyo Hababka Isku-dhafka ah." Daab-acadda Sage

### 1.2.5 Qaab-Dhismeedka Falanqaynta

Qaab-Dhismeedka Awood-siinta Haweenka (WEF) waa qaab fikradahaan dhammaystiran ku haboon sii koor loo qaado islamaraahantana loo qiimeeyo loona koriyo dhinacyada kala duwan ee awood-siinta haweenka. Waxaa asal ahaan sameeyay cilmi-baarayaal ka shaqeeya jinsiga iyo horumarinta sida Kabeer (1999)<sup>3</sup>, Rowlands (2016)<sup>4</sup>, iyo kuwa kale, qaab-dhismeedkan wuxuu bixiyaa hab dhammaystiran oo lagu fahmo arrimaha suuragaliya awood-siinta haweenka iyo caqabadaha hortaagan Isha: sawirka qoraaga: waxaa laga soo qaatay N. Kabeer (1999).

Qaab-dhismeedka Awood-siinta Haweenka (WEF) wuxa uu ka kooban yahay dhowr qaybood oo muhiim ah. Awood-siinta dhaqaale waa dhinac udub dhexaad ah, iyadoo diiradda la saarayo jidka ay haweenka ku heelikaraan kheyraadka maaliyadeed iyo sida ay ku xakamayn karaan kheyraadkaas, sida ka qaybgalka suuqa ganaacsiga, iyo awoodda suuragalin karta go'aan qaadashada dhaqaale. Awood-siinta waxbarasho waa qayb kale oo muhiim ah, taasoo ku saabsan helitaanka waxbarashada, heerka dhamaystirka, heerarka aqoonta qorista iyo akhriska, iyo fursadaha waxbarashada haab noolaleedka iyo horumarinta xirfadaha farsamada. Awood-siinta caafimaadka waxay taabanaysaa helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka, xuquuqda caafimaadka taranka, taageerada caafimaadka maskaxda, iyo guud ahaan wanaagga caafimaad.

Awood-siinta nafsiyeed sidoo kale waa qayb muhiim u ah qaab-dhismeedka, taasoo ku saabsan kalsoonida nafta, isku kalsoonida, madax bannaanida shakhsiga, iyo xuuriyadda ka imanaysa xadgudubka maskaxeed ama qasbida. Awood-siinta siyaasadeed iyo madaniga waxay khusaysaa ka-qaybgalka haweenka ee nidaamyada siyaasadeed, metalaadda haweenka ee hay'adaha go'aaminta, iyo ka-qaybgalka howlaha madaniga ah. Awood-siinta bulshada iyo dhaqanka waxay qaabilsantahay saameynta xeerarka jinsiyeedka, dhaqamada, taageerada qoyska, iyo helitaanka shabakadaha bulshada. Awood-siinta sharciga iyo garsoorka waxay khusaysaa helitaanka haweenka ee caddaaladda, wacyigalinta sharciga, ilaalinta ka dhanka ah xadgudubka ku salaysan jinsiga, iyo fulinta xuquuqda sharciga. Ugu dambeyntii, nabadda iyo amniga waxay ku saabsan yihiin badbaadada haweenka ee dagaalka iyo rabshadaha, ka-qaybgalka haweenka ee hababka nabad-dhisidda, iyo guud ahaan amniga haweenka ee goobaha bulshada iyo kuwa gaar ah.

Intaas waxaa sii dheer, qaybaha ku saabsan awood-siinta sharciga, garsoorka, iyo sidoo kale awood-siinta caafimaadka ayaa si wanaagsan ula jaan qaada qiimeynta arrimaha la xiriira xadgudubka jinsiga iyo kan ku saleysan galmada. Tani waxay bixisaa qaab lagu qiimeeyo waxtarka ilaalinta sharciyada hadda jira iyo nidaamyada taageeriida. WEF waxay taageertaa isticmaalka xoogta tirakoobka iyo Tayada xoogta, taas oo muhiim u ah hab-raaca daraasadka ee isticmaalaya sahan qaran iyo aaladaha tayada leh si loo ururiyo aragtiyo faahfaahsan oo ku saabsan noolasha haweenka Itoobiya. Natijoooyinka ku saleysan WEF waxay kaalin ka qaadan karaan talooyinka siyaasadda iyo horumarinta barnaamijyada lagu xalinayo farqiga la ogaaday iyo koor u qaadista awood-siinta haweenka ee qaybaha kala duwan ee Itoobiya.

<sup>3</sup> Kabeer, N. (1999). "Khayraadka, wakiilnimada, guulaha: Milicsiga cabbiraadda awood-siinta dumarka." Horumarinta iyo isbeddelka, 30(3), 435-464.

<sup>4</sup> Rowlands, J. (2016). Power in practice: Bringing Understandings and Analysis of power into Development Action in Oxfam. IDS Bulletin, 47(5), 119-130

## Qaab-dhismeedka Fikradaha: 2023 Xaaladda iyo mudnaanta Haweenka Itoobiya

### Awood-siinta Haweenka

#### Mawduucyada Bulshada iyo Dhaqaalaha

Awood-siinta Dhaqaalaha  
Awood-siinta Caafimaadka  
Awood-siinta Waxbarashada

#### Hamiga iyo Wakaalada

Siyaasadda iyo Ka-qaybgalka Bulshada  
Helitaanka Nabadda iyo Ammaanka

#### Fursadaha iyo Adkeysiga

Xadgudub ku salaysan jinsiga  
Xoojinta Cilmi-nafsiga  
Helitaanka Caddaaladda

# 2

## Natiijooyinka Ugu Muhiimsan

MAWAADIICDA NOOLASHA  
Caqabadaha iyo Adkaysiga  
Hamiga iyo Wakaalada  
Helitaanka Waxbarashada Haweenka  
Caaqabadaha Iyo Xaakameenta

### 2.1 MAWAADIICDA NOOLASHA HAWEENKA

Qoraalkan wuxuu soo koobayaa mowduucyo kala duwan oo la xiriira noolasha haweenka, taas oo laga bilaabaya xoogta dhaqaale kuna xiijsinayso caafimaadka iyo hawl-karnimada haweenka. Xoog muhiim ah oo ku saabsan waxbarashada iyo fursadaha waxbarasho ayaa sidoo kale lagu soo daray, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo akhriska, akhriska dijitaalka ah, yoolka waxbarasho, iyo caqabadaha waxbarashada.

#### 2.1.1 Xaaladda Dhaqaale ee Haweenka

- Inkasta oo ay jiraan hoormar dhiinaca ka-qaybgalka dhaqaalaha haweenka haddana farqiga kamuuqda jinsiga ayaa wali weeyn, iyadoo inta badan haweenka ay ku mashquulsanyihiin shaqo-maalmeed ama shaqoyinka qoyska kaas oo inta badan an wax daqlii ah ku koordhiin haweenka. Markii la weydiiyay ku lug lahaanshahooda shaqada todobaadkii hore ee sahanka, 27.3% haweenka ayaa sheegay inay ku hawlan yihiin shaqo dhaqaale wax-soo-saar ah, 41.3% shaqo guri, iyo 17.8% oo ku lug leh labadaba wax-soo-saar iyo hawlo guri. Tani waxay ka dhigan tahay in qiyaastii 45.1% ay ku jiraan shaqo wax-soo-saar ah. Natiijada shaqo wax-soo-saar ah waxay la jaanqaadaysaa natiijada Sahanka Awoodda Shaqada iyo Socdaalka (LMS) (ESS, 2021), kaas oo helay in 42.4% haweenka shaqo haysta ay shaqaynayeen todobaadkii ka horreeyay sahanka.
- Xogtu waxay muujinaysaa in karinta iyo diyaarinta cuntooyinka ay yihiin hawlaha ugu badan ee guuri ee haweenka da' kasta, gobol kasta, iyo xaaladda madaxda, iyadoo 82.5% haweenka la sheegay inay ku hawlan yihiin, taasoo ah heerka ugu sarreeya marka loo eego hawsha guri ee xigta, nadiifinta weelasha iyo guriga (4.1%);
- 59.6% haweenka ayaa la sheegay inay leeyihiin guri deggenaansho; wada lahaanshaha ayaa ah nooca ugu weyn ee lahaanshaha haweenka oo gaadhaya boqolkiiba 75.0% (haweenka soo sheegay lahaanshaha), halka lahaanshaha kaligood uu yahay 19.8% iyo labadaba kaligood iyo wadajir 5.3%.
- 40.4% haweenka ayaa la sheegay inay leeyihiin dhul beereed, iyadoo 74.8% ka mid ah ay wada leeyihiin, 21.7% ay haystaan kaligood iyo 3.6% labadaba wadajir iyo kaligood; Ku dhawaad 15.0% haweenka ma haystaan wax dukumiinti ah oo ku saabsan dhuul beereedka, halka 61.1% ay sheeganayaan inay haystaan shahaadada caadeenaya lahaanshaha dhulka.
- Inta badan haweenka Itoobiya waxay sheegaan inay isticmaalaan agabka beera sida abuurka la hagaajiyay (57.7%), bacriminta kiimikada (65.5%), kiimikooyinka/caarada/korantada (60.9%), xoolaha lagu beero (51.7%) iyo inay ka warqabin hababka ilaalinta ciidda iyo biyaha (51.5%). Dhinaca kale, inta badan haweenka ma haystaan helitaan haraad (73.6%) iyo adeegyada barnaamijka korantada (62.3%).
- Inkastoo qaar ka mid ah haweenka ay ka qaybqaataan go'aan wadajir ah oo ku saabsan hantida iyo dhaqaalaha, tiro badan ayaa weli ka maqan xakameynta kheyraadka dhaqaale ee muhiimka ah iyo go'aannada, gaar ahaan qoysaska ay madax ka yihiin ragga. Inta badan haweenka guursaday waxay sheegaan inay go'aan ka gaaraan qaybsiga hantida si wadajir ah ninka ay guursadeen, iyadoo qaybinta ay ka bilaabanto 83.5% marka la amaahdo (iyadoo guriga ama dhulka la isticmaalayo sidii dammaanad) ilaa 92.2% marka ay xakameynayaan dakhliga ka soo xarooda iibinta alaabada.



Heerka  
Dhaqaalaha  
Dumarka 15+

Awood-siinta Haweenka

27.3%  
Shaqooyin  
wax soo saar  
leh

41.3%  
Hawlaha  
Gudaha

17.8%  
Hawlaha  
Gudah iyo  
wax

- Ku dhawaad 12.7% haweenka guursaday ma ka qaybqaataan go'aannada ku saabsan amaahashada iyadoo la adeegsanayo dhulka sidii dammaanad, halka 9.7% aanay ka mid ahayn go'aannada ku saabsan wareejinta (dhaxlinta, dhaxalka, iwm) ama kiraynta dhulka qoyska.
- Sidoo kale, tiro weyn oo haweenka guursaday ah ayaa ka reeban go'aannada ku saabsan dakhliga ay kasbadeen (33.1%), dakhliga ay kasbadeen raggooda (31.6%), iibsashada weyn ee qoyska (32.3%), iibinta wax soo saarka (29.4%), iyo sida loo isticmaalo amaahda ay hesho (24.0%)
- Isku ceelceelis 42.8% oo haween ah ayaa ku hoos nool qoysas aay ragu hoogamiyan kuwas oo ku noolyihiin beeraha ha ahate 4.1 ila 12.7% haween gaadhaya ayaa an laga qaybgaliin lahaanshaha dhuulka beeraha iyo wax so saarka. Inta waxa sii dheer haween Isku ceelceelis 33.1% gaadhaya kama qayb qaatan goan qaadashada dhaqaalaha ka so xaaroda beeraha sida ay wariisay IGAs. Isku ceelceelis 2.8% gaadhaya ayaa isticmaala amaahda ay bixiayaan haayadaha kaladuwan, Isku ceelceelis 24.0% haween gaadhaya ayaa aan ka qayb qaadanin goan qaadashada ka faideysiga dhaqaalaha ay qoysasku heelan iyo amaahda qoyska. Tani waxay muujinaysa inaysan haweenku ku lahayn door saameen kuleh isticmaalka maalka iyo goan qaadashada dhaqaalaha midaas oo door weeyn u noqoon lahayd kubciinta awooda haweenka.
- Haweenka badankood Isku ceelceelis tira gaadhaysa (57.3%) malaha akawunada bangiiaasha, ha ahaate inta isticmaasha akawunada bangiiaasha Isku ceelceelis waxay gaadhan 38.4% kaliya, sidokale tira gaadhaysa Isku ceelceelis 4.3% waxay isticmaalaan akawunada udhaxeeya sayiigooda.
- Daraasaadkan waxa ka soo baxday ka qaybgalka haweenka haayadaha kala duwan ee hoormarka in uu koobanyahay. Ha ahaate Tiirada ugu badan ee ka qaybqaatan waxay ka qaybgalaan uruurada haweenka kuwaas oo iskuceelceelis tira gaadhaysa (9.6%), kuwaas ay so raacan SHGs (4.3%), kuwa ka qayb qaata uruurada dhalayarta iskuceelceelis waxay gaadhan (2.4%), kuwa ka qaybqaata uruurada aqoonyahminta waxay gaadhan (1.5%), MSEs, kuwa ka qaybqaata uruurda ganacsatada waa (1.4% each). Ciilimibaadhistan waxay muujinaysa haweenka ka qaybqaata uruurada haweenka inay aad u badanyihiin marka labarbardhiigo uruurada kale ay ka qaybqaataan haweenka. Haa ahaate natiijada guud waxay muujinaysa ka qaybgalka haweenka hayadaha kala duwan ee hoormarka in uu aad u hooseeyo loona bahaanyahay in koor lo qaado.
- Haween ka qayb qaata diyaarinta daraasadkan waxay sheegen inay ladiibaateysanyihiin isku ceelceelis tira gaadhaya 60.3% aay sixiir bararka ku dhacay maciishada, isku ceelceelis, 42.6% aay la dhiibanyihiin awooda dhaqaala la,anta ama awooda wax iibsashada, haween gaadhaya isku ceelceelis 20.9% waxay la dhiibanyihiin xaasiilooni daro iyo nabadgaliyo daro, 20.8% waxay kujiraan gooba dagaala aan kala jogsii lahayn ka soocdan , 14.4% waxay la dhiibanyihiin abaar daran, iyo 131% waxay la dhiibanyihiin hanuun ku so nooqnoqda qoysaska. Dhibaatooyinka la xidhiidha xaasiilooni darada iskusii bay uu saameeyaan qoysaska raga hogaanshan iyo kuwa dumarku hogaanshan lakin goobaha dagaalada kajiraan waxay si gaar ah u saameeyeen qoysaska haweenka ay u hayaan hogaanka.



- Natijada daraasaadkan waxay sheegaysa in ay haween gaadhaysa 8.2% ay ka faideeystan barnaamijka Mashruuca shabakada badbaadada wax soo saarka leh (PSNP) Midas waxay lajaanqaadaysa hiimilada PSNP'-da lagarabp in uu gaadhiyo midas oo ugu yaraan isku ceelceelis 10% qoysaska shacaabka itoobiya ku nool dagmooyinka lagaadhsiiyo isku fiilnaashaha cuunada, isku ceelceelis haween gaadhaya 11.5% ay ka caawimaad laga heelo hayadaha samafalka faideeystan 12 bilood kahor inta an daraasaadka la sameenin.
- Inta waxa dheer oo ka so baxay wada tashiiga kooxaha ee haweenka (PAR) in ay jiraan caqabadaha hoor tagan hoormarka dhaqaalaha haweenka. Caqabadaha waxay saameeyan shaqsiyaadka, mid qooyo, iyo dhamaan buulshada ay kamidtahay aragti yariida, baaaldareenta waqtiiga, iyo shaqa kala qaybsashada qoysaska kuwaas oo lagu darsay ciilmibaadhis ay sameeysay dood kooxeedka haweenka (WGDs) lagu sameeyay 3 qaybood katirsan caasimada addisababa iyo degaanka beenishaanguul magaalada asoosa. Inta waxa dheer inay haweenku lakuulmaan caqabada la xiidhidha ciilmiga suuq gaynta, tababaro la,an, iyo aqoon la,an dhaqaalaha iyo niidaamka maaliyada midaas oo dhiibaata ku nooqotay koobcinta dhaqaalaha haweenka sida ay sheegan haween laga wareeystay WGDs in Arba Minch Zuria woredas (South Ethiopia).
- Isku so duudub oo dhibaatooyinka la haalmaala coolada iyo dhiibaatooyinka laga dhaxaalo dagaalada marka laga baxo coolada waxay sii koordhiyeen caqabadaha koobcinta dhaqaalaha haweenka waxa kamid ah sida buurburka kudhacay suuqa, iyo buurburka hoormarka dhaqaalaha sida jiidadka oo buurburay, waxa sii batay shaqa la,anta, sida ay sheegen haween ku nool maqalee casiimada tiigreega sida ay sheegtay WGDs ciilmibaadhis ay kasameeysay Mekelle, Hawuzen, iyo degmada Hagereselam woredas (degaanka Tiigreega) waxa ka so baxay inay bateen dhiibaatooyinka qasatan ku dhaca haweenka sida kuufsiga, kala goa-qoysaska, iyo qoysaska ay haweenku hogaamiyaan oo so badanayo. Kuwas oo si koordhiyay dhiibaatooyinka ay haweenka lakullman dhiinaca dhaqaalaha kuwas oo kamid ah sida dhaqaalaha haweenku ka heelayeen shaqooyinka suuqa.



### 2.1.2 Xaaladda Caafimaadka Haweenka

- Natijoooyinka waxay muujinayaan in inta badan dumarka (73.6%) ay aaminsan yihiin inay heli karaan adeegyada caafimaadka, iyadoo intooda badan (81.5%) ay og yihiin in adeegyadaas la heli karo.
- Waxaa jira farqi weyn oo ka jiro kaabayaasha caafimaadka, gaar ahaan meelaha ka soo kabanaya dagaallada, miyiga, iyo meelaha aan si fiican loo adeegsan, taas oo saameynaysa helitaanka adeegyada caafimaadka galmada iyo taranka (SRH) ee dumarka. Natijoooyinka Cilmi-baadhis Ficil Wadaag ah (PAR) waxay muujinayaan in magaalooyinka waaweyn sida Addis Ababa, inkasta oo adeegyada caafimaadka ay si fudud loo heli karo, haddana waxaa jira dhibaatooyin la xiriira helitaanka iyo awood u lahaanshaha dawooyinka, iyadoo ay jiraan yaraanta daawooyinka muhiimka ah. Halka Tigray, gaar ahaan goobaha barakacayaasha (IDP), dumarku ay la kulmaan caqabado xagga helitaanka adeegyada caafimaadka, labadaba yaraanta dawooyinka iyo kaabayaasha aan ku filnayn darteed.
- Kharashka sare ee adeegyada caafimaadka (30.2%) iyo jiritaanka caymiska caafimaadka (26.3%) ayaa ka mid ah caqabadaha ugu weyn ee haweenka hortagaan helitaanka adeegyada caafimaadka. Intaa waxaa dheer, waxaa jira dhibaatooyin la xiriira gaadiidka (15.1%) iyo wakhtiyada sugitaanka oo dheer (10.9%), taasoo muujinaysa caqabadaha la xiriira Hawlaha Saadka iyo kaabayaasha. Dhibaataadani waxay si gaar ah u muuqataa aagagga miyiga .
- 36.3% haweenka ayaa sheegay inay helaan macluumaad ku saabsan caafimaadka galmada iyo taranka, oo ay ku jiraan HIV/AIDS, muddada 12-ka bilood ee la soo dhaafay.
- Natijoooyinka tayada waxay muujinayaan caqabadaha haweenka la kulmaan si ay u helaan macluumaadka caafimaadka galmada iyo taranka. Xannibaadaha dhaqanka iyo dabeecadaha xiirfadlayaasha adeegyada caafimaadka ayaa qarqaladeeya isgaadhsiinta furan ee arrimahan, gaar ahaan aagagga miyiga ah halkaas oo ka hadalka caafimaadka galmada iyo taranka ay tahay mid-an dhaqanahaan la taageersanayn.
- Xoogta ayaa muujinaysa in 60.7% haweenka ay haatan isticmaalaan nooc ka mid ah hababka qorshaynta qoyska(FP). XAALADAHKA KALADUWAN ee degaanada waxay muujinaysaa farqi weyn inay udheexayso dhiinaca ku dhaqanka qorshaha qoyska(fp), kudhaqanka qoorshaha qoysaska ay mujinayso inay sareeyso deegaanada Koonfur-galbeed Itoobiya (80.4%) iyo Addis Ababa (73.5%), halka degaanka Soomaalidu uu kujiro degaanada aad u hooseeya marka lagu qiimeeyo iskuceelceelis yahaay 20.5%.
- Su'aalaha waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan noocyada kala duwan ee xidhmooyinka nadaafadda ee haweenka da'da taranka (15-49 sano), iyadoo 57.7% ay isticmaalaan xidhmooyinka hal-mar ah, 9.3% haween ahaan ay isticmaalaan kuwa dib loo warshadeeyay, halka 29.2% ay isticmaalaan kuwa maxalli ah. Sababaha ugu waaweyn ee ay ku sheegeen inay u isticmaali waayaan xidhmooyinka nadaafadda ayaa ah helitaan la'aan (42.9%) iyo awood la'aan (17.1%) iyo wacyigelin la'aan (27.2%).



### 2.1.3 Helitaanka Waxbarashada Haweenka

- Heerka akhriska iyo qoraalka ee haweenka Itoobiya waa 55.1%, taasoo ah mid hooseysa marka loo eego dalalka kale ee qaaradda Sahra-madow. Tusaale ahaan, dalalka sida Kenya iyo Koonfur Afrika ayaa leh haweenka akhrin kara iyo wax qoori kara tiira ahaan inaga sareeya 70%.
- Haweenka da'da 15-29 ayaa haweenka akhrin kara iyo wax qoori kara, tira ahaan isku ceelceelis ah 76.3%, halka kuwa da'da 50+ ay leeyihiin haweenka akhrin kara iyo wax qoori kara ah 17.1%. Sidoo kale, haweenka ku sugan magaalooyinka waxay u badan tahay inay leeyihiin haweenka akhrin kara iyo wax qoori kara marka loo eego kuwa ku sugan aagagga miyiga .
- Marka laga hadlayo aqoonta dijitaalka ah, 15% ayaa aqoon u leh isticmaalka kombuyuutarka, isku ceelcelis 21.8% ayaa aqoon u leh inay isticmaalaan internetka, iyo isku ceelceelis 53.8% ayaa qiirtatay inay isticmaalaan telefoon.
- Falanqaynta caqabadaha haweenka ee waxbarasho ee ugu waaweyn waxaa ka mid ah taageero la.anta qoyska waxa lagu qiyaasa isku ceelceelis (30%), ay sameen ku sameeyan. Dhibaatooyinka la xiidhidha dhinaca dhaqaalaha waxa lagu qiyaasa isku ceelceelis (27.2%) iyo waajibaadka shaqo la.anta ayaa lagu qiyaasa (15.6%). isku ceelceelis marks 45.3% ay la kulmaan caqabado ku aaddan sii wadida waxbarashada.
- Marka laga hadlayo aragtida haweenka ee waxbarashada gabdhaha, 72.9% waxay rabaan fursado siman oo loogu talagalay wiilasha iyo gabdhaha, halka 10.9% ay rabaan fursad ka wanaagsan oo loogu talagalay wiilasha. Kaliya 10% ayaa sheegeen in gabdhaha yaryar ay heli karaan fursado ka badan wiilasha yaryar.
- Su'aalaha ayaa muujiyay farqi weyn oo ku saabsan heerarka akhriska iyo qoraalka ee ku saleysan qiyaasta hantida, iyadoo kuwa ku jira qiyaasta hantida sare ay muujinayaan heerarka akhriska ugu sarreeya, halka kuwa ku jira qiyaasta hantida hoose ay ka dambeeyaan.
- Natijoooyinka tayada ee ka yimid Assosa (Benishangul Gumuz) iyo Bahirdar degaanka Amhaarada ) ayaa sidoo kale muujinaya in inkasta oo horumarka la sameeyay, haweenka iyo gabdhaha ay la kulmaan dhowr arrimood oo saameeya guusha waxbarasho. Arrimahan waxaa ka mid ah, caadooyinka dhaqanka iyo hab-dhaqanka, sawirada jinsiga, rabshadaha ku saleysan jinsiga, gurka carruurta ama gurka dhallinyarada, iyo uur-qaadashada dhallinyarada, dhammaantood waxay saameyn ku yeeshaan helitaanka iyo dhammaystirka waxba rashada gabdhaha. Kooxaha nugul, gaar ahaan haweenka naafada ah, waxay la kulmaan caqabado dheeraad ah, waana in waajibaadka aan la helin ee shaqooyinka guri la muujiyo inta badan doodaha.
- Ka qaybgalayaasha wada Hadalka koxaha Hawenka (WGD) ee Samara, Logia, iyo Dubti (Canfarta) waxay muujinayaan in caadooyinka dhaqanku ay mudnaanta siiyaan gurka hore ee waxbarashada gabdhaha, halka Bahir Dar (degaanka Amhaarada Amhara) ay ka mid yihiin caqabadaha la aqoonsaday inay yihiin masaafada dheer ee dugsiyada iyo walaac ku saabsan amniga oo ay ka dhashaan colaadaha hubaysan. Tigray, burburka dagaalku wuxuu saameeyay helitaanka waxbarashada



Fursada  
waxbarashada  
haweenka  
15+ sanadod



Heerka aqriiska iyo qoraalka (15-29 sanadood)



Heerka aqriiska iyo qoraalka (50+ sanadood)



Isticmaalka koobitarka



Lakulma caqabado ka hoortagaan waxbarashada



Ubaahan fursad cadaali ah

## 2.2 Caaqabadaha Iyo Xaakameenta

Qaybtani waxay iftiiminaysaa caqabadaha haweenka iyo adkeyntooda, iyadoo si gaar ah diiradda u saareysa Xadgudubyada ku saleysan jinsiga, tilmaamaha nafsanaiga ah, iyo helitaanka caddaaladda.

### 2.2.1 Xaad Gudubyada Jinsiga iyo Xadgudubyada ku Saleysan Jinsiga

- Nooc kasta oo ah rabshadaha ku saleysan jinsiga ka hor intaan la qaban sahanka 12-kii bilood ee la soo dhaafay ayaa lagu soo waramayaa 20.2%, iyadoo degaanada Sidama, Canfarta, Amhara, iyo Tigray ay hoggaaminayaan dhacdooyinka xadgudubka ku saleysan jinsiga.

- Sahanku wuxuu uruuriyey xog ku saabsan noocyada kala duwan ee rabshadaha jireed. Natijada guud waxay muujinaysaa in 9.3% haweenka la sahmeyey ay la kulmeen rabshad jireed 12-kii bilood ee la soo dhaafay. Dembiilayaasha ugu badan ee rabshadaha jireed, waxaa badanaa ah lamaanayaasha qoyska, iyadoo ragga ama lamaanayaasha ay yihiin dembiilayaasha ugu waaweyn ee qaybaha badan;
- Marka laga hadlayo natijada xadgudubyada galmada, waxay muujineysaa in 6.0% haweenka ay la kulmeen hal ama in ka badan oo noocyada xadgudubka galmada 12-kii bilood ee la soo dhaafay, taas oo aad ugu eg xogta laga soo warbixiyey Sahanka Tirada iyo Caafimaadka (DHS) 2016 (6.5%). Sahanku wuxuu uruuriyey xog ku saabsan noocyada kala duwan ee tacadiyada nafaaniga ah, waxaana natijada muujinaysa in 13.3% haweenka ay la kulmeen hal ama in ka badan oo noocyada tacadiyada nafaaniga ah sannadkii la soo dhaafay. Marka laga hadlayo tacadiyada dhaqaale, natijada waxay muujinaysaa in 5.8% haweenka ay la kulmeen hal ama in ka badan oo noocyada tacadiyada dhaqaale.
- Sahanku wuxuu muujiyey in 14.0% haweenka ay isku dayeen inay raadiyaan caawimaad ka dib markii ay la kulmeen rabshad. Dhinacyada raadinaya adeegyada, in ka badan kala badh (55.2%) haweenka ayaa sheegay inay awoodi waayeen inay helaan adeegyo markay isku dayeen inay raadiyaan caawimaad ka dib markii ay la kulmeen xadguudub.
- Guud ahaan, 81.0% haweenka ayaa sheegay inay maqli jireen qabka haweenka, iyadoo 48.5% haweenka ay sheegeen inay qabteen; degaanaada Soomaalida (83.5%) iyo Canfarta (70.2%) ayaa muujinaya faa'iidada ugu sarreeya ee Gudninka firconiga (FGM).
- Isticmaalka caddaynta ka timid Tigray, natijooyinka Cilmi-baadhis Fecil Wadaag ah (PAR) waxay muujinayaan sida dhammaan noocyada xadguudubyadu uu koor ukacay waqtiyada colaadaha hubaysan. Natijooyinka Cilmi-baadhis Fecil Wadaag ah (PAR) waxay muujinayaan caqabadda weyn ee dhammaan noocyada xadguudubyada ka dhanka ah haweenka.
- Cilmi-baarista waxay sidoo kale iftiiminaysaa gaaritaanka jawaabta xadgudubka ku saleysan jinsiga ee aagagga dagaalka iyo dadka barakacay. Ka qaybgalayaasha dhibbanayaasha xadgudubka ku saleysan jinsiga ee Mekelle iyo Hawuzen (Tigray) waxay muujinayaan in fiir gaar ah loo leeyahay dhibbanayaasha xadgudubka ku saleysan jinsiga ay weli ku filnayn si loo daboolo baahiyahooda. Kaliya maaha inay jiraan wax la'aanta mas'uuliyadda iyo caddaaladda, laakiin sidoo kale dhibbanayaashu waxay u baahan yihiin waxyaabaha aasaasiga ah sida cuntada, hoyga, talo-bixinta, iyo helitaanka guryaha amniga ah halkaas oo ay ka raadsan karaan magangelyo iyo taageero.

## 2.2.2 Maskax Fayoobida Haweenka iyo Qaabka Waxka Qabashada

Warbixintu waxay baareysaa cabbirrada muhiimka ah ee wanaagga nafsiga iyo shucuurta haweenka iyadoo la adeegsanayo qaabab kala duwan oo ay ku jiraan kalsoonida haweenka, wanaagga nafsiga, is-qadarin, heerarka qanacsanaanta, iyo heerarka walaaca;

- Natijooyinka cabbirrada kalsoonida waxay muujinayaan in natijoo iyo jawaabo raja fican leh ay hoggaaminayaan. Markii la eego in qiimaha celceliska uu u dhaxeeyo ugu yaraan 12 ilaa ugu badnaan 60, celceliska dhibcaha wuxuu taagan yahay 48.8. Doodda ka socota Kooxda Haweenka, waxay muujineysaa in ay jiraan sinaan la'aan jinsiga oo baahsan oo ku sii jirta bulshooyinka ugu badan, taasoo ka dhigaysa kalsoonida haweenka mid hooseysa. Tusaale ahaan, ka qaybgalayaasha Logia (Canfarta) ka sheegeen khibrad nafta shaki ku dhisan oo ay sababeen eexda dhaqanka ee hortaagan kalsoonidooda iyo xirfadaha go'aan-qaadashada, taas oo saameyn ku yeelata dareenka guud ee kalsoonida nafsiga. Sidoo kale, Oromia-Metu, doodaha waxay diiradda saaraan saameynta qootadheer ee rabshadaha nafsiga ee ka dhalanaya dhaqamada waxyeelada leh.
- Qanacsanaanta waxaa lagu qiyaasay iyadoo la adeegsanayo cabbirro heer caalami ah oo la xiriira qoyska, saaxiibada, shaqada, dakhliga, guriga haweenka ku nool yahay, iyo noolasha guud ahaan. isku Celcelis ahaan dhibicda 27.7 ayaa la soo wariyay waxay muujinaysaa in, celcelis ahaan, haweenka Itoobiya ay joogaan heer qanacsanaan dhexdhexaad ah oo ku saabsan lixda arrimood ee la cabiray; qiimaha ugu yar iyo ugu badan ayaa ah 7 iyo 49 sidiisa.
- Heerarka walaaca iyo walbahaarka sidoo kale waa la cabiray haweenka Itoobiya. Waxay daboolaysaa walaacyada caadiga ah sida amniga shaqada, xasiloonaada dhaqaale, helitaanka lamaanaha ku habboon, iyo la kulanka kharashyada aan la fileyn. Natijooyinka waxay muujinayaan dhibic 14.6 oo muujinaysa in, celcelis ahaan, haweenka Itoobiya ay soo sheegayaan heer walwal iyo walaac oo sarreeya oo ku saabsan shanta arrimood ee la cabiray. Celceliska dhibcaha ayaa u dhaxeeya ugu yaraan (5) iyo ugu badan (25) dhibcaha suurtoogalka ah.
- Sahanku wuxuu ku talagalay in lagu fahmo wanaagga nafsiga iyo is-qadarin ka dhexaysa haweenka Itoobiya. Natijooyinka waxay muujinayaan in isku celceliska dhibcaha haweenka Itoobiya uu yahay 23.6, iyadoo ay jirto caabir u dhexeeya 12 (ugu yar) ilaa 60 (ugu badan). Tani waxay muujinaysaa heer dhexdhexaad ah oo wanaagga nafsiga iyo is-qadarin ah ee ka dhex muuqda dadka la sahmeyey.

## 2.2.3 Heelitaanka Cadaaladda Haweenka

- Warbixinta Khilaafaadka: Kaliya 5.1% haweenka ayaa sheegay inay la kulmeen khilaafaadyo 12-kii bilood ee la soo dhaafay, iyadoo khilaafaadka inta badan ay ka yimaadeen arrimaha qoyska (45%) iyo dhulka (21%).
- Khilaafaadka Magaalooyinka iyo Deegaanka: degaanaada la laga sameeyay ciilmibaadhistan waxay ku badanyihin magaalooyinka heer khilaafyo sare (5.9%) marka la barbar dhigo miyiga (4.7%).
- Taageerada Xallinta Khilaafaadka: Dhammaan kuwa warbixinta khilaafaadka bixinayay, 45% ayaa raadsaday taageero, waxaana ugu badan caawinta deegaanka (61.8%), kadibna adeegyada sharciga (21.4%) iyo caawinta sharciga (12.6%).
- Raali ahaanshaha Taageerada: 66.6% kuwa helay caawimo ayaa muujiyay raali ahaansho, halka 21.2% ay muujinayaan inay ku qanacsan yihiin.

## 2.3 Himilooyinka iyo Awooda

Qaybtan waxay kahaadlaysa himilooyinka iyo awooda haweenka iyada oo lagu qeexayo sida ay ukala hooreyan mudnaanta himiillooyinka gudaha qaybaha kala duwan ee heerarka dowliiga. Sida ka qatbgalka siiyaasada iyo uruurada bulshada, iyo aragtiida nabadgaliyada iyo amniiga wasiidan soosocda.

### 2.3.1 Mudnaanta iyo Himilooyinka Haweenka

- Heerarka Himilooyinka: Qayb weyn (69.3%) haweenka Itoobiya ayaa sheegay inay leeyihiin himilooyin hoose ka qaybgalka maamulka, iyada oo kaliya isku ceelcelis 13.8% ay muujinayaan himilooyin sare.
- Mudnaanta Muhiimka ah: Sahanku wuxuu muujiyay amniga iyo nabadda isku ceelcelis tahay (71.6%), fursadaha dhaqaale isku ceelcelis tahay (61.1%), iyo helitaanka daryeelka caafimaadka isku ceelcelis tahay (55.5%) inay yihiin walaacyada ugu weyn ee haweenka. Kaabayaasha iyo adeegyada aasaasiga ah isku ceelcelis tahay (36.2%) ayaa ku xiga, halka ka qaybqaadashada siyaasadda ay heshay mudnaanta ugu yar (2.4%).

### 2.3.2 Siyaasadda iyo Ka Qaybqaadashada Bulshada

- Wacyiga Sharciga: Wacyiga Dastuurka Itoobiya ayaa ahaa kan ugu sarreeya isku ceelcelis yahay 52.4%, iyadoo heerarka wacyiga hoose ee sharciga shaqada isku ceelcelis yahay (24%).
- Baadhista daraasaadka waxa lagu ogaaday inay haaf ka qaybgalayaasha daraasaadka ay fahaan kooban ka haystaan axaakaanta wadanka ka qaybgalayaasha (asoosa degaanka beenishaanguul) waxay sheegeen inay ku adagtahay fahaankooda sharciga la xiidhiidha sharciga lahaansha dhuulka.
- Baadhista daraasaadka waxa lagu ogaaday 84.1% ayaa garanaya magaca raisulwazaaraha wadanka, 34.8% waxay garanayaan madaxweeynaha wadanka magacisa, sidokale 44.5% waxay yaqaanaan xisbiiga talada haayo guud ahan wadanka.
- Aragtida Siyaasadeed: Badankood haweenka (53.1%) waxay ka soo horjeedaan in raggu yihiin hogaamiyeyaal ka wanaagsan, iyadoo taageerada weyn la muujinayo in haween la doorto hoggaan. Marka 34.4% haween ah wali aaminsanyihiin inay ragu ay yihiin hoogaanka qoysaska, 67.2% ay qabaan inay wanaagsantahay haweenka lo doorto hoogaanka qoysaska. 71% waxay ka haadleen inay wanaagsantahay haweenka laga dhiiga gudoomiyaasha dagmooyinka.
- Ka Qaybqaadashada Codbixinta: 77.1% haweenka ayaa qorsheynaya inay codeeyaan doorashada xigta, iyadoo 71.6% ay iska diiwaan galiyen oo ay coddeeyeen doorashadii ugu dambaysay. Kuwa baaldaraysay coodkoda waxa kamid ah coodka (n=9162) Sababaha codbixinta oo aan la helin ayaa waxaa ka mid ah da'da (49.2%), baqdiin 13.1%, coodadka ka b.aldarobay 10.2%, hanuun 8.3%, kuwa an waqtii uheewlin inay codeeyaan 5.8% iyo baqdiin qaabka lagu coodeyo arman garan weeyna 3%.
- Marka la su'alay gudahaan Haweenka ka qaybqaatay wareeysiga daraasaadka kaliya tira gaadhaysa 8.4% ayaa kamid ah uruurada haweenka 1.9% ayaa kamid ah hogaaminta qabalayaasha iyo dagmooyinka, 2.1% aya kamid ah haayadaha cadaalada iyo maxkamadaha, 2.1% waxay kamid yihiin axsaabta kajira wadanka.

- Inkasta oo la sheegay horumar ku saabsan ka qaybqaadashada siyaasadeed ee haweenka tusaale (dagmada awbare ee degaanka somaalida, samara deganka canfarta) sii toos ah ka dhaqdhaqaaqa siiyaasada qaar kamid ah haweenka oo ka qaybqaata WGD tusaale (asoosa degaanka beenishaanguul) haddana haween badan ayaa muujinaya niyad jab ku saabsan nidaamka siyaasadeed iyo in codkood aan si ku filan loo matalin. Xubinimada Ururada: Qaybta yar ee haweenka ayaa ku xiran ururo kala duwan, taas oo muujinaysa caqabado laga yaabo inay ku jiraan ka qaybqaadashada bulshada.

### 2.3.3 Xaaladda Nabadda iyo Amniga

- Marka la eego aragtida xaaladda nabadgaliyada, isku ceelcelis tahay 56% ee ka qaybgalaayaasha daraasadka waxay sheegeen in nabadgaliyada aad u wanaagsan tahay, halka isku ceelcelis tahay 10% ay aaminsan yihiin in xaaladda nabadda ay hagaagayso degaankooda. Dhinaca kale, qiyaastii isku ceelcelis tahay 16.6% waxay sheegeen in xaaladda nabadda ay sii xumaaneyso sanadkii, iyo isku ceelcelis tahay 17.2% aay sheegeen in aanay jirin bataatanba waxa layiiraado nabadgaliyo. degaanka Amharada ayaa leh boqolkiiba ugu badan ee ka jawaabayaashu sheegaya in aanay jirin nabad (52%). 48.4% siida ay sheegen dumarka aaminsan inay xaaladda nabadda sii xumaaneyso sanadkiiiba.
- Dhibaatooyinka Haweenka: In kasta oo tirakoobku muujinayo xaalad wanaagsan, dood-wadayaasha ka socda Kooxda Wada-hadalka Haweenka (WGD) ee ku sugan degaana magaaloyinka ee Addis Ababa, Tigray, Benishangul, iyo Amhara ayaa muujinaya dhibaatooyinka haweenka so tarmaya ee ku soo wajahaya dareenkooda amniga iyo badbaadada.
- Noocyada Khilaafaadka: Noocyada waaweyn ee khilaafaadka ee haweenka la kulmaan waxaa ka mid ah: khilaafaadka hubaysan isku ceelcelis tahay (29.5%), khilaafaadka agabka isku ceelcelis tahay (12%), khilaafaadka qabiilka isku ceelcelis tahay (14.1%), khilaafaadka diinta isku ceelcelis tahay (6%), khilaafaadka xuduudaha isku ceelcelis tahay (16.5%), iyo boobka isku ceelcelis tahay (13.4%).
- Walwalka Badbaadada: Haweenka la wareystay, 30.2% ayaa sheegtay inay mar walba ama badanaa ka welwelsan yihiin amniga nafsigooda iyo kan qoysaskooda, halka 47.4% ay sheegeen inaysan welwelin ama ay aad u yar tahay. Gobollada Amhara, Benishangul Gumuz, iyo Tigray ayaa leh boqolkiiba sare oo cabsi la xiriirta khilaafaadka hubaysan, halka gobolka Canfarta uu muujinayo heer aad u sareeya oo cabsi ah oo la xiriirta dhaca.
- Saameynta Khilaafaadka Huubaysan: Sahanku wuxuu muujinayaa in isku ceelcelis tahay 17.4% haweenka ay la kulmeen khilaaf hubaysan sanadkii la soo dhaafay. Haweenka ku sugan Benishangul Gumuz, Canfarta, Amhara, iyo Tigray ayaa leh heerka ugu sarreeya ee dhibaataada ka dhalata khilaaf hubaysan. isku ceelcelis tahay 47.4% kuwa la kulmay khilaafka hubaysan ayaa ahaa kuwo ku barakacay gudaha.
- Doorarka dumarka ee dadaallada nabadda wuxuu muujinayaa in kaliya isku ceelcelis tahay 0.9% dumarka ay ka qayb qaateen sidii hoggaamiyayaal ama qabanqaabiye, halka isku ceelcelis tahay 15.5% ay ka qayb galeen sidii iskaa wax u qabso ama ka qayb galayaal. Intaas waxaa dheer, 37.7% dumarka ayaa muujiyay xiisaha ay u qabaan inay ka qayb qaataan dadaallada nabadda, halka 45.9% aysan xiiseyn ama aysan awoodin inay ka qayb qaataan.
- Marka lagu daro natiijooyinka sahanka qaran, natiijooyinka ka soo baxay wada hadallada la yeeshay ka qayb galayaal ka socda xeryaha barakacayasha -da ee Mekelle (Tigray) waxay muujinayaan in ay jirto baahi xun oo amni, taas oo si gaar ah u saameynaysa badbaadada dumarka iyo gabdhaha. Deganeyaasha waxay soo bandhigayaan walaac / jawi cabsi ah, halkaas oo tuugo, dhibaataayn, iyo awood la'aan ilaalin ay caadi yihiin. Natiijooyinka ( PAR )waxay sidoo kale muujinayaan burburka ka dhashay dagaalka, oo ay ku jiraan burburka noolasha, kaabayaasha muhiimka ah, xarumaha waxbarashada, iyo adeegyada la xiriira xadguudubiyada galmada iyo ku salaysan jinsiga (GBV) iyo adeegyada caafimaadka.
- Inkasta oo dumarku muujiyaan xiisaha xooggan ee ay u qabaan ka qayb qaadashada dadaallada nabadda, daraasaddu waxay muujinaysaa caqabado dhowr ah oo hortaagan ka qayb qaadashadooda. Kooxda Wada-hadalka Haweenka(WGD) oo lagu sameeyay Bahir Dar (Amhara) iyo Arba Minch agagaarka Woreda (Koonfurta Itoobiya) waxay soo jeedinaysaa in hab-dhaqanka bulshada iyo dhaqamada, waxbarashada xaddidan iyo helitaanka kheyraadku ay saameyn ku leeyihiin ka qayb qaadashadooda



## Gunaanad Iyo Talo Bixiin

Ujeedada daraasadka waxay ahayd in la soo saaro caddayn dhamaystiran oo ku saabsan xaaladda dumarka iyo mudnaantooda dhinacyo kala duwan oo muhiim u ah noolasha dumarka, iyadoo la adeegsanayo xoogta tirakoobka ee laga helay guryaha 12 gobol iyo 2 Maamulo Magaalo oo daboolaya 119 degmo/tuulo/hoos-magaalo oo Itoobiya ah, iyo macluumaad tayo leh oo laga helay 8 degaan oo ay ka qayb qaateen kooxaha dumarka iyadoo la adeegsanayo hababka natiijooyinka Cilmi-baadhis Fecil Wadaag ah (PAR). Natiijooyinka iyo doodaha lagu soo bandhigay qaybaha hore, waxaan soo saarnay gabagabooyinkan hoos ku qoran, oo ku bilaabmay mowduucyada waaweyn ee noloshada dumarka, kuwaas oo ay ka mid yihiin, dhaqaalaha, caafimaadka, iyo waxbarashada.



### Dhaqaalaha

**Kala duwanaansho ku saabsan Jinsiga ee Shaqada:** Inkastoo horumar yar laga gaaray ka qaybgalka dhaqaalaha haweenka, waxaa jira farqi weyn oo u dhaxeeya ragga iyo dumarka, iyadoo haweenka badankood ku hawlan yihiin shaqooyinka iskood ah ama shaqooyinka aan la siin wax mushahar ah ee qooyiska, taas oo muujineysa caabbinta dhaqanka ee ku wajahan shaqooyinka wax-soo-saarka haweenka iyo masuuliyadooda aadka u badan ee shaqooyinka guriga iyo daryeelka oo aan la siin wax abaal ah. Xubinimo daciif ah: Ka qaybgalka haweenka ee ururrada deegaanka iyo ururrada shaqaalaha waa mid aad u hooseeya, taas oo xadidaysa helitaanka macluumaadka, fursadaha, iyo goobaha ay ku cabiraan cabashooyinkooda, taas oo kordhisa nuglaanta ay u qabaan noocyada kala duwan ee rabshadaha iyo wiiqida awoodooda dhaqaale.

**Awooda go'aan qaadasho oo aan sinnaanin:** In kasta oo haween qaar ka mid ah ka qayb qaataan go'aan qaadashada wadajirka ah ee ku saabsan hantida iyo dhaqaalaha, haddana tiro badan ayaa weli ka maqnaanshaha xakamaynta kheyraadka dhaqaale ee muhiimka ah iyo go'aamada, gaar ahaan qoysaska uu ninka madaxda ka yahay. Tani waxay ka dhigan tahay in haysashada shahaadada lahaanshaha hantida iyo helitaanka kheyraadka dhaqaale ay haweenku maaha in si toos ah ugu tarjuntay awoodda go'aan qaadashada haweenka ee isticmaalka hantidaas iyo kheyraadkaas. Xorriyaddan la'aantu waxay wiiqeysaa awoodda dhaqaale ee haweenka iyo noloshooda guud ahaan.

**Caqabado ku xeeran waxsoosaarka beeraha:** Haweenku waxay la kulmaan caqabado waaweyn oo ku saabsan helitaanka agabka muhiimka ah ee beeraha iyo adeegyada sida waraabka iyo adeegyada kordhinta waxsoosaarka, taas oo wiiqda awoodooda ay wax ku biirin karaan beeraha iyo sugnaanta cuntada, iyadoo la muujinayo baahida loo qabo faragelinno gaar ah oo taageera beeraleyda haweenka.

**Helitaanka Tamarta:** Haween qaarkood weli waxay ku tiirsan yihiin dhuxul iyo qoryo si ay ugu karsadaan, taas oo khatar caafimaad iyo dhibaatooyin ku saabsan waartaanka deegaanka keenta. Tiirsanaantan ayaa weli ka jirta xitaa magaaloyinka waaweyn sida Addis Ababa, taas oo muujinaysa baahida muhiimka ah ee loo qabo in la ballaariyo helitaanka ilo tamar oo nadiif ah.

**Saamaynta Dhacdooyinka Dhaqaale iyo Colaadaha:** Haweenka ayaa si xad dhaaf ah u saameeya dhallinta dhaqaale, sida kor u kaca qiimaha cuntada, kharashyada wax soo saarka, iyo colaadaha. Dhacdooyinkan waxay sii adkeeyaan nuglaanshaha gaarka ah ee jinsiga, oo ay ku jiraan kordhinta xarqaladaaha ku saleysan jinsiga, burburka qoysaska, iyo dhaawacyada nafsaaniga ah, taas oo muujinaysa baahida loo qabo nidaamyo difaac bulsho oo dhameystiran iyo taageerooyin lagu xoojiyo adkeysiga iyo awoodsiinta haweenka.

**Saamaynta Dhacdooyinka Dhaqaale iyo Colaadaha:** Haweenka ayaa si xad dhaaf ah u saameeya dhallinta dhaqaale, sida kor u kaca qiimaha cuntada, kharashyada wax soo saarka, iyo colaadaha. Dhacdooyinkan waxay sii adkeeyaan nuglaanshaha gaarka ah ee jinsiga, oo ay ku jiraan kordhinta xarqaladaaha ku saleysan jinsiga, burburka qooyaska, iyo dhaawacyada nafsaaniga ah, taas oo muujinaysa baahida loo qabo nidaamyo difaac bulsho oo dhameystiran iyo taageerooyin lagu xoojiyo adkeysiga iyo awoodsiinta haweenka.



## Caafimaadka

**Kala duwanaanshaha Juqraafiga ee Helitaanka Daryeelka Caafimaadka:** Waxaa jira kala duwanaansho weyn oo udhaxaya degaanada oo ku saabsan helitaanka daryeelka caafimaadka haweenka Itoobiya, iyadoo degaanada qaarkood, sida Sidama, ay la kulmaan caqabado aad u weyn. Tani waxay muujineysaa kala qeybsanaan aan sinnayn oo ku saabsan kheyraadka iyo adeegyada caafimaadka ee dalka oo dhan.

**Caagabadaha Maaliyadeed ee Daryeelka Caafimaadka:** badankooda haweenka Itoobiya waxay la kulmaan caqabado maaliyadeed oo ka hor istaaga inay helaan adeegyada caafimaadka ee loo baahan yahay. Culayskan maaliyadeed ayaa sii xoogaystay qooyaska ay haweenku madaxda ka yihiin iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo, taas oo muujinaysa baahida loo qabo faragelino maaliyadeed si loo hubiyo helitaan caafimaad oo sinnaan leh.

**Hoos u dhaca Adeegyada Fidinta Caafimaadka:** Waxaa la soo sheegay hoos u dhac ku yimid waxtarka Shaqaalaha Fidinta Caafimaadka (HEWs) ee deegaannada miyiga. Hoos u dhaca tayada adeegyada iyo fidinta waxay saameyn ku yeelatay caafimaadka haweenka, gaar ahaan gobollada fog ee ay HEWs inta badan yihiin isha ugu weyn ee macluumaadka iyo adeegyada caafimaadka

**Heerarka Sarreeya ee Takoorka iyo Sumcad-xumada ee Caafimaadka:** Haweenka Itoobiya waxay inta badan la kulmaan takoorka iyo baahdiilka goobaha caafimaadka, taas oo ka dhigaysa inay ka baqaan raadinta daryeelka ay u baahan yihiin. Arrintan soo jireenka ah waxay muujineysaa baahida weyn ee loo qabo in la sameeyo horumar ballaaran oo ku saabsan dhiinaca tababarka caafimaadka iyo siyaasadaha si loo abuuro deegaan ka midaysan oo taageero leh.

**Waxbarasho aan Ku Filnayn oo ku saabsan Caafimaadka Galmada iyo Taranka:** Waxaa jira farqi weyn oo ku saabsan wacyiga haweenka ee macluumaadka caafimaadka galmada iyo taranka. Caqabadaha sida xayndaabyada dhaqanka iyo kheyraadka xaddidan ayaa weli jira, gaar ahaan deegaannada miyiga ah.



## Waxbarashada

Heerka wax-akhriska haweenka ee Itoobiya oo ah isku ceelcelis 55.1% ayaa aad u hooseeya marka la barbar dhigo wadamada qaar ee ku yaal Afrika ka hooseeya Saxaraha. Tusaale ahaan, wadamo sida Kenya iyo Koonfur Afrika ayaa leh heerar sare oo wax-akhris ah oo haweenka ah, oo inta badan ka badan isku ceelcelis tahay 70%. Tani waxay muujineysaa caqabadaha hortaagan hirgelinta barnaamijyo iyo siyaasadaha wax-barasho oo wax ku ool ah si loo yareeyo farqiga una hagaajiyo natiijooyinka wax-barashada haweenka.

**Kala duwanaanshaha Da'da ee Heerarka Wax-akhriska:** Natiijooyinka ayaa muujinaya in heerka wax-akhriska haweenka Itoobiya si weyn ugu kala duwan yahay da'da. Haweenka da'doodu u dhaxayso isku ceelcelis tahay 15-29 ayaa leh heerka ugu sareeya ee wax-akhriska, halka haweenka waayeelka ah, gaar ahaan kuwa da'doodu tahay 50 iyo wixii ka sareeya, ay leeyihiin heerar wax-akhris oo aad u hooseeya.

**Saamaynta Dhaqaalaha Bulshada iyo Arrimaha Juqraafiga:** Heerka waxbarashada ee haweenka Itoobiya waxaa si aad ah u saameeya xaaladda dhaqaale ee qoyska iyo meesha ay ku nool yihiin.

**Kala Qaybsanaanta Waxbarashada ee Magaalooyinka iyo Miyiga:** Waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya heerarka waxbarashada ee magaalooyinka iyo miyiga, iyadoo haweenka magaalooyinka guud ahaan ay gaaraan heerar waxbarasho oo sarreeya. Sidoo kale, haweenka waxay la kulmaan caqabado kala duwan oo adag oo ku saabsan raadinta waxbarasho, sida dhibaatooyinka dhaqaale, shaqooyinka aan la siinin abaalmarin ee guriga, guurka carruurta, iyo caqabadaha ay la kulmaan haweenka naafada ah.

## 3.1 Caqabadaha iyo Adkaysiga

### Xadgudubka ku Saleysan Jinsiga:

Dhacdada harqaladaha ka dhanka ah haweenka waxay ku kala duwan tahay kooxaha da'da, iyadoo heerarka ugu sarreeya lagu arko haweenka da'da yar, sidii la filayay. Sidoo kale, haweenka xiriirka ku jira, kuwa la guursaday ee guurka badan (polygamous) leh, iyo kuwa kala tagay ayaa muujinaya boqolleyda ugu sarreysa, taasoo muujineysa halista sare ee kooxahani la kulmaan. Gobol ahaan, waxaa jira kala duwanaansho, iyadoo Sidama, Afar, iyo Gambella ay muujinayaan heerarka ugu sarreeya ee rabshadaha ka dhanka ah haweenka. Intaa waxaa sii dheer, haweenka ku nool qaybaha saboolka ah ee bulshada iyo kuwa ku nool miyiga ayaa la kulma heerar sare oo rabshado ah, taasoo muujineysa is-dul-taaga saboolnimada iyo nuglaanshaha.

Wadarta guud ee harqaladaaha ka dhanka ah haweenka ayaa ah isku ceelcelis 20.2%, laakiin kooxda daraasadka waxay soo gabagabeeyeen in tirakoobka harqaladaaha ku saleysan jinsiga ee Itoobiya laga yaabo inuusan si buuxda u muujin tiirada dhabta ah ee arrintan muhiimka ah. Dambiiyaasha harqaladaaha ayaa laga yaabaa inay si firfircoon u qariyaan ama yareeyaan ficiladooda faldanbiyeedka leh; sidoo kale, dhibbanayaashu ma aha mar walba inay aqoonsadaan noocyada qaarkood ee harqaladaaha, sida ka faa'iideysiga dhaqaale iyo isku dayga niyad-jabka. Ficilladan ayaa laga yaabaa inay noqdaan kuwo caadi ahan lala qabsaday ama la iska indho-tiro gudaha dhibbanayaasha laftooda, taasoo keenaysa in aan lagu darin tirakoobka rasmiga ah. Intaa waxaa sii dheer, haweenka ku nool xeryaha barakacayaasha (IDP) iyo kuwa ku nool goobaha colaadaha ayaa aad uu nugul dhammaan noocyada harqaladaaha ku saleysan jinsiga waxayna u baahan yihiin ilaalin gaar ah.

### Qodobada Maskahda

**Awoodda Nafta:** Natiijooyinka ku saabsan cabbirka awoodda nafta waxay soo jeedinayaan in badanaa ay jiraan jawaabo togan, laakiin sidoo kale waxay iftiiminayaan in arrimo sida kaalinta dhaqameed ee jinsiga, helitaan la'aanta waxbarasho iyo fursado dhaqaale, iyo isku fiilnaasho bulshada ay caqabad ku noqdaan haweenka, taasoo ka dhigaysa inay dhib kala kulmaan rumaynta kartidooda. Haweenka ayaa inta badan muujinaya dareen kalsooni-darro iyo ku filnaan la'aan, taas oo saamaynaysa kalsoonidooda iyo awoodda ay u leeyihiin inay go'aanno qaataan.

**Qanaacada Noolasha:** Natiijooyinka waxay muujinayaan in dumarka Itoobiya ay la kulmaan heerar hoose oo ku qanaacsananta noolasha sababo la xiriira xaalada noolashooda kujiraan, iyaga oo tilmaamaya caqabado la xiriira xasilloonida dhaqaale, helitaan daryeel caafimaad, iyo xaaladaha.

**Khilaafka:** Qodobadani waxay ka qayb qaataan dareen aan qanaac lahayn waxayna caqabad ku noqdaan caafimaadka guud ee dumarka. Iyaga oo ku keenaya Culays iyo Walwal: Culayska iyo walwalku waa waayo-aragnimo caadi ah oo ay la kulmaan dumarka, gaar ahaan marka laga hadlayo caqabado bulsheed iyo dhaqaale sida faqriga, harqaladaaha ku saleysan jinsiga, iyo helitaanka ilaha oo xaddidan.

Noolal-wanaag iyo Kalsoonida Nafta: Haweenka Itoobiya, inta badan, waxay la kulmaan kalsooni-darro iyo dareen aan qiimo lahayn, oo ay saameeyeen caadooyinka bulsho iyo aaminsanaanta dhaqanka. Haweenka ayaa sheegay inay la kulmeen takoor, harqalada, iyo kamid nooqoshada, taasoo si xun u saameysa dareenkooda noolal-wanaag iyo qiimaha naftooda.

## Himilooyinka iyo Awoodda

**Rajada Mustaqbalka iyo Amniga waqtigan:** Dumarka Itoobiya waxay la kulmaan walwal amni oo weyn, iyada oo tiro badan oo ka mid ah ay dareemayaan amni darro iyo raja xuuma amni muustaqbalka dhaw.

**Himilooyinka Ku Biirista Dhismayaasha Maamul:** Inta badan dumarka Itoobiya waxay leeyihiin himilooyin hoose oo ku saabsan ka qaybgalka dhismayaasha maamul ee maxalliga ah, taasoo muujinaysa caqabado nidaamsan sida waxbarasho la'aan, kheyraad la'aan, iyo caadooyin dhaqan oo hortaagan ka qaybgalka.

Major priority issues: Safety and security are the top priority concerns for Ethiopian women, reflecting their actual experiences against a backdrop of conflict, violence, and fragility. Economic opportunities and access to healthcare are also significant concerns.

## Siyasadda iyo Ka Qaybgalka Bulshada

**Ogaanshaha Siyasadda iyo Dhaqanka:** Tirada badan ee haweenka Itoobiya waxay dareemayaan inaysan fahmi karin waxa ka socda siyaasadda, taasoo muujinaysa aragti ballaaran oo ku saabsan adkaanta siyaasadda ama ka qeybgal la'aanta. Waxbarashadu waxay saameyn weyn ku leedahay ogaanshaha siyaasadda iyo dhaqanka maamul. Dumarka aqoonta leh waxay u badan tahay inay su'aalo ka keenaan maamul iyo inay aaminsan yihiin in dumarku ay helaan fursad la mid ah tan ragga si ay u noqdaan xildhibaan.

**Ogaanshaha Siyaasadaha iyo Shuruucda:** Waxaa jira heerar kala duwan oo ogaansho ah oo ay dumarka Itoobiya leeyihiin ku saabsan shuruucda iyo siyaasadaha muhiimka ah, iyada oo ay jiraan farqi weyn oo ku saabsan kooxaha da'da.

## Nabadgaliyada-iyo-Amniga

**Ka Qaybgalka Geeddi-socodka Nabadgaliyada:** Ka qaybgalka dumarka ee geeddi-socodka nabadgaliyada iyo amniga Itoobiya weli waa mid aad u hooseeya. Inkasta oo doorka muhiimka ah ee ay dumarku ka ciyaaraan ka hortagga khilaafaadka, dhex-dhexaadinta, iyo dib u dhiska marka colaadda ay dhammaato, codkooda iyo aragtiyadooda si joogto ah ayaa loo tirtiraa qaybahaan. Kala-miirnaanta jinsiga ayaa ka tarjumeysa sinnaan la'aanta bulshada iyo caadooyinka dhaqan ee lagu tiriyay ragga oo weli xaddidaya kaqaybgalinta dumarka ee jagooyinka hoggaanka siyaasadda iyo militariga.

**Kala-duwanaanshaha degaanada ee Amniga iyo Badbaadada:** Waxaa jira kala duwanaansho degaanada oo la taaban karo oo ku saabsan sida dumarku u arkaan nabadgaliyada iyo badbaadada. Dumarka ku nool degaanada sida Afar iyo Harari ayaa dareema inay ammaan badan yihiin marka loo barbardhigo kuwa ku nool Benishangul Gumuz iyo Amxaarada, halkaasoo ay ka jiraan walaacyo amni oo sii kordhaya.

**Saameynta Colaadaha Huubeysan:** Colaadaha huubeysan waa walaac weyn, gaar ahaan degaanada sida Amxaarada, Tigray, iyo Benishangul Gumuz. Colaadahaas waxay si daran u saameeyaan badbaadada dumarka, taasoo horseedaysa cabsi sare, barakac, iyo burbur ku yimaada nidaamka bulshada, taasoo u baahan xal degdeg ah oo ku saabsan nabadda iyo dib u heshiisiinta.

**harqaladaaha ku Saleysan Jinsiga iyo Caqabadaha Nidaamsan:** harqaladaaha ku saleysan jinsiga (GBV) waxay weli tahay dhibaato weyn, iyadoo ay jiraan caqabado nidaamsan sida heelis la'aanta fursadaha shaqo, waxbarasho, iyo daryeel caafimaad. Dhibaataadani waxay muujineysaa baahida loo qabo barnaamijyo siyaasadeed oo dhammaystiran wax ka qaban karta dhibaataada waqtiiga degdegga ah ee amniga iyo sinnaan la'aanta gamuurtay ee muddada dheer lagu so dhaqmay.

**Aragtiyo Kala Duwan oo Ku Saabsan Nabadgaliyada:** In badan oo ka mid ah dumarka ayaa ku tilmaamay xaafadhooda inay yihiin kuwo nabdoon, hase yeeshee qayb weyn oo iyaga kamiid ah ayaa dareensan in xaaladda nabadgaliyada ay sii xumaanayso ama aysan nabadba jirin. Aragtiyadan kala duwan waxay muujinayaan khibrado aan isku mid ahayn oo ku saabsan nabadgaliyada iyo amniga, iyada oo ay saameynayaan isbeddellada goboleed iyo kuwa maxalli ah, waxayna muujineysaa baahida loo qabo dadaallo nabad-dhisid oo loo bartilmaameedsanayo.

## 3.2 Talo-bixiin

### Xoojinta Dhaqaalaha iyo Noolasha

#### Dowladda iyo Ka Qaybgalayaasha:

- Taageero gaar ah oo loogu talagalay haweenka:** Iyada oo la tixgelinayo xaaladaha kala duwan iyo mudnaanta haweenka ee deegaanada iyo kooxaha dadka kala duwan, waxaa muhiim ah in faragelinta la habeeyo si ay ugu habboonaato profiles-ka gaarka ah iyo heerarka kala duwan ee saameynta ay yeelan karaan.
- Milkiyadda iyo helitaanka** kheyraadka kaliya ma siinayso haweenka awoodda go'aan qaadashada, taasoo u baahan tallaabooyin dheeri ah si haweenka loo xoojiyo inay doortaan hantidooda.
- Xoojinta Helitaanka Muulkiyada Dhulka:** Sidii ku cad Tiirarka Istaraatiijiga 8 (Gender iyo Ka Mid Noqoshada Bulshada) ee qorshaha horumarineed qaran ee toban-sano ah (2021-2030): (i) Xooji nidaamka sharcieynta ee taageeraya helitaanka haweenka ee milkiyada kheyraadka (dhul iyo guri) iyo hirgelinta siyaasadaha si loo hubiyo xuquuqda milkiyadda hanti ee haweenka. (ii) Ballaarinta dadaallada shahaadada dhulka/guriga, oo ay ku jiraan magaca haweenka ku jira dukumentiyada dhulka/guriga, gaar ahaan haweenka ku nool qooyaska ragga hoggaamiya, iyo ilaalinta xuquuqda dhulka ee haweenka.
- Xoojinta Barnaamijyada Difaaca Bulshada:** Xooji barnaamijyada difaaca bulshada sida (Barnaamijka Badbaadada Wax-soo-saarka ) PSNP iyo Barnaamijka Badbaadada Wax-soo-saarka ee Magaalooyinka (UPSNP) , si loo gaadho haween badan oo u baahan loona siiyo taageero dhaqaale xilliyada adag ee dhaqaale. Samee nidaamyo digniin hore iyo jawaab celin masiibo oo jinsiyad saameyn leh si loo xoojiyo awoodda haweenka ee la qabsanaya loona xoojiyo uu adkaysigooda si ay u ilaashadaan noolashooda. Sidoo kale,
- Siinta haweenka helitaanka agabka:** Kor u qaad helitaanka agabka muhiimka ah ee haweenka, sida waraabka, barnaamijyada fidinta iyo macluumaadka tiknoolajiyadda la xiriira si loo yareeyo nuglaantooda ku aaddan dhabar-jabka la xiriira cimilada, iwm.
- Taageerada Ganacsiga Haweenka:** Kor u qaad ka qaybgalka maaliyadeed iyada oo loo marayo mashaariic lagu ballaarinayo helitaanka haweenka ee adeegyada maaliyadeed, sida akoonnada kaydka iyo microfinance, barnaamijyada caymiska, iyo bixinta tababaro ku saabsan aqoonta maaliyadeed si loo xoojiyo xirfadaha maareynta maaliyadeed. Hirgelinta barnaamijyada lagu taageerayo ganacsatada haweenka, oo ay ku jiraan bixinta helitaanka tababaro, hagid, iyo fursado maalgelin si ay u bilaabaan oo u kobciyaan ganacsiyadooda. Waxaa sidoo kale la tixgelin karaa in haweenka lagu xidho fursadaha shaqo/shaqo ee la heli karo. Fursadahan waxay mudnaanta siiyaan deganada soo koraya iyo deegaanada miyiga ah halkaasoo fursadahan ay aad u yar yihiin.
- Kor u qaadida helitaanka Dhaqaale:** Horumarinta barnaamijyo kordhinaya helitaanka haweenka ee adeegyada maaliyadeed, sida akoonnada kaydka iyo maalgelinta yar yar, iyo bixinta tababar waxbarasho maaliyadeed si loo xoojiyo xirfadahooda maaraynta dhaqaale.
- Hubiyo in xeerarka maaliyadeed ay u jawaabaan baahiyaha iyo** mudnaanta haweenka iyo in la hirgaliyo hababka fulinta si loo xoojiyo go'aan qaadashada haweenka ee ku saabsan qeybinta kheyraadka maaliyadeed sida amaahda;
- Xoojinta bixinta haweenka helitaanka:** ilo tamar oo kale oo ay ku jiraan taageerada tababarka farsamada ee lagama maarmaanka ah si loo yareeyo saameynta caafimaad iyo deegaanka ee xun ee ka dhalanaysa isticmaalka biomass-ka sidii ilaha iftiinka iyo shidaalka karinta.
- Xoojinta bixinta haweenka ee gelitaanka ilaha:** kale ee tamarta oo ay ku jiraan taageerada tababarka farsamada ee lagama maarmaanka ah si loo yareeyo saameynta caafimaad iyo deegaanka ee aan wanaagsaneyn ee ka dhalato adeegsiga dhuxusha oo ah isha iftiinka iyo shidaalka karinta.
- Horumarinta siyaasado iyo barnaamijyo taageeraya haweenka:** tusaale ahaan, ansixinta siyaasadda sinnaanta jinsiga iyo awoodsiinta haweenka ee dib u eegista ku jirta, hirgelinta iyo fulinta xeerarka shaqada oo dhiirrigeliya sinnaanta jinsiga si haweenka ay si buuxda oo cadaalad ah uga qeyb qaataan suuqa shaqada; Kor u qaadida dhaqanka miisaaniyad u nugul jinsiga iyo hirgelinta si loo gaaro go'aamiyayaasha siyaasadda iyo go'aan qaadayaasha heerar kala duwan. Kor u qaad oo hirgeli xarumaha xanaano ee ku saleysan loo shaqeeyaha (sida ku cad tiirka istaraatiijiyadda 9 ee qorshaha horumarinta tobanka sano) si loo xoojiyo ka qaybgalka haweenka ee shaqada wax soo saarka.

## Hay'adaha Samafalka (NGOs) iyo Ururada Bulshada Rayidka ah:

- Difaacida Xuquuqda Haweenka:** La shaqeynta ururada deegaanka iyo kooxaha haweenka si loo difaaco siyaasadaha iyo shuruucda kor u qaada sinnaanta jinsiga iyo awoodsiinta dhaqaale ee haweenka. Sidoo kale, kor u qaad wacyiga bulshada si loo beddelo fikirka khaldan ee ku saabsan ka qaybgalka haweenka hawlaha soo saarista dakhliga.
- Bixinta Tababarka iyo Xoojinta Awoodda:** Sii barnaamijyo tababar iyo horumarinta awoodda haweenka ku saabsan ganacsiga, maamulka maaliyadda, iyo xirfadaha hoggaaminta si kor loogu qaado fursadhooda dhaqaale iyo awoodsiinta. Taageer haweenka inay isticmaalaan dhulkooda si ay u helaan deyn iyadoo la raacayo sharciga cusub ee isticmaalka iyo maareynta dhulka miyiga (2024).

## La-hawlgalayaasha Horumarinta:

- Taageerida Dib-u-habaynta Siyaasadaha iyo Horumarinta Dhaqaalaha:** Sii taageero farsamo iyo mid dhaqaale loo meel mariyo oo loo fuliyo siyaasadaha koobcaya xuquuqda iyo fursadaha dhaqaale ee haweenka, gaar ahaan mashaariicda taageeraya xuquuqda haweenka ee dhulka, ka-mid noqoshada maaliyadeed, iyo awoodsiinta dhaqaale.
- Dardar-gelinta Iskaashiga:** La shaqeenta ururada maxalliga ah iyo hay'adaha dawladda si loo fuliyo barnaamijyo iyo faragelinno u-qalma jinsiga oo wax ka qabta baahiyaha iyo mudnaanta haweenka ee gobollo kala duwan oo Itoobiya ka mid ah.

## Caafimaadka

### Dawladda

- Hagaajinta Helitaanka Adeegyada Caafimaadka:** Maalgelinta ballaarinta kaabayaasha caafimaadka, gaar ahaan goobaha ka soo kabanaya dagaalka, miyiga iyo meelaha aan si fiican loo adeegsan, si loo kordhiyo helitaanka adeegyada caafimaadka ee dumarka. Tani waxaa lagu gaari karaa iyada oo loo marayo dib-u-dhiska wanaagsan ee mashaariicda dawladda, gaar ahaan meelaha dagaalka saameeyay. Tani waxay ka mid tahay wax ka qabashada caqabadaha sida qiimaha sare ee adeegyada caafimaadka.
- Baahida caymiska caafimaadka, iyo caqabadaha gaadiidka:-** Xoojinta Waxbarashada Caafimaadka Galmada iyo Taranka: Hirgelinta barnaamijyo dhameystiran oo waxbarasho oo ku saabsan caafimaadka galmada iyo taranka ee dugsiyada, bulshada, iyo xarumaha caafimaadka si dumarku ay u helaan macluumaad sax ah iyo agabyo si ay u gaaraan go'aanno xog ogaal ah oo ku saabsan caafimaadkooda taranka.
- Horumarinta Adeegyada Qoorshaynta Qoyska:** Ballaarinta helitaanka hababka kala duwan ee qoorshaynta qoyska, oo ay ku jiraan kaniiniyada iyo adeegyada caafimaadka taranka, iyadoo la xaqiijinayo in si siman looga heeli karo dhammaan degaanaada. Sidoo kale, maalgelinta oolooleyaal gaar ah si koor loogu qaado wacyiga ku saabsan qorshaynta qoyska iyo wax ka qabashada caqabadaha dhaqanka ee ku xeeran isticmaalkeeda. Adeegyada caafimaadka hooyada iyo ilmaha (MCH) iyo caafimaadka taranka (SRH) waxay u baahan yihiin fiiri gaar ah.
- Wax Ka Qabashada Baahiyaha Caafimaadka Xilliga Caadada:** Sameynta mashaariic lagu hagaajinayo heelitaanka agabka nadaafadda caadada ee la awoodi karo oo nadiif ah, sida suufyada nadaafadda, iyo bixinta wacyi gelin ku saabsan maarynta nadaafadda caadada gabdhaha iyo dumarka, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan ikhtiyaarrada la heeli karo iyo hababka saxda ah ee lagu tuuri karo.

## Ururada aan dowliga ahayn (NGOs) & Ururada Bulshada Rayidka ah (CSOs):

Dhiisida Barnaamijyo Waxbarashada Caafimaadka Bulshada: La shaqeynta bulshooyinka maxalliga ah si loo hirgeliyo barnaamijyo waxbarasho oo ku saabsan caafimaadka galmada iyo taranka, qoorsheynta qoyska, iyo maarynta nadaafadda caadada. Barnaamijyadani waa inay la jaan qaadaan dhaqanka iyo baahiyaha gaarka ah ee degaanaada iyo bulshada kala duwan. U oolooleeynta siyaasado isbedal ku sameeya: U oolooleeynta in la ansixiyo lana fuuliyo siyaasada mudnaanta siinaya caafimaadka haweenka, oo ay ku jiraan tallaabooyin wax looga qabanayo caqabadaha hortaagan helitaanka daryeelka caafimaadka, hagaajinta adeegyada caafimaadka taranka, iyo hubinta helitaanka alaabada nadaafadda caadada oo qiimo jaban leh. Bixi Adeegyo Taageero: U fidii adeegyo taageero caafimaadka haweenka, oo ay ku jiraan la-talinta, rugaha caafimaadka taranka, iyo mashaariicda caafimaadka ku saleysan bulshada, si loo daboolo baahiyaha kala duwan ee haweenka ku nool guud ahaan Itoobiya.

## La-hawlgalayaasha Caalamiga ah:

Taageer Horumarinta Kaabayaasha Caafimaadka: Bixiin taageero farsamo iyo mid dhaqaale si kor loogu qaado kaabayaasha caafimaadka ee Itoobiya loona hagaajiyo heelitaanka adeegyada caafimaadka tayada leh ee haweenka, gaar ahaan meelaha fogfog iyo miyiga. Maalgelinta Barnaamijyada Caafimaadka Taranka: U qoondeeynta maalgalin taageeraya barnaamijyada caafimaadka taranka iyo mashaariicda yoolka u ah in la hagaajiyo heelitaanka adeegyada qoorsheynta qoyska, daryeelka hooyada, iyo waxbarashada caafimaadka galmada iyo taranka ee haweenka iyo gabdhaha. La Shaqee Ururada Maxalliga ah: La kaasho ururada maxalliga ah iyo hay'adaha dawladda si loo hirgeliyo barnaamijyada caafimaadka haweenka iyo faragelinta, iyadoo la kaashanayo khibrada iyo agabka maxalliga ah si loo gaaro saameyn badan loona gaadho bulshooyin kala duwan.

## Waxbarashada

### Dowladda

- Kordhiinta Heelitaanka Waxbarashada:** Hirgaliinta siyaasadaha iyo barnaamijyada lagu talagalay in lagu kordhiyo heelitaanka waxbarashada (tusaale, waxbarashada dadka waaweyn) ee haweenka iyo gabdhaha, gaar ahaan meelaha miyiga ah iyo kuwa aan ku filnayn, iyada oo diiradda la saarayo haweenka da'doodu tahay 30 sano iyo waxi kaweeyn. Maalgelinta waxbarasho oo ku saabsan haay'adaha waxbarashada ee ay saameysay coolaada; ka shaqeynta jabka la arkay ee heerarka akhriska iyo qoraalka ee qaybaha hodanka ah, si loo hubiyo helitaanka waxbarasho oo cadaalad ah oo ay helaan haweenka Itoobiya. Si hufan oo wax ku ool ah loo xalliyo arrintan, faragelinta si gaar ah loo beegsanayo waa in la hirgeliyaa si loo siiyo taageero waxbarasho oo habaysan iyo agab loogu talagalay haweenka ku jira qaybta dhaqaalaha hoose.
- Wax Ka Qabashada Caqabadaha Waxbarashada:** Horumarinta mashaariic lagu xallinayo caqabadaha ay la kulmaan haweenka iyo gabdhaha marka ay raadinayaan waxbarashada, oo ay ku jiraan taageerada qoyska oo liidata, cunaqabateeynta dhaqaale, iyo masuuliyadaha shaqooyinka biilaashka ah. Bixiinta taageero iyo dhiirrigalin si gaar ah loogu talagalay si loogu dhiirrigeliyo isdiiwaangelinta iyo kusuugnaanta gabdhaha dugsiyada.
- Kor u Qaadda Aqoonsiga Dijitalka ah:** Ku darida barnaamijyada aqoonsiga dijitalka ah manhajka waxbarashada si loo hubiyo in haweenka iyo gabdhaha ay haystaan xirfadaha lagu maareynayo loona isticmaalo tignoolajiyada si hufan. Bixiinta heelitaanka kormeerayaasha kombuyuutarka iyo ilaha internetka dugsiyada iyo bulshooyinka si loo buuxiyo farqiga dijitalka.

## Ururada aan dowliga ahayn (NGOs) & Ururada Bulshada Rayidka ah (CSOs):

- U Ooloolee Siyaasadaha U Jawaabaya Jinsiga:** U ooloolee ansixinta iyo fuulinta siyaasadaha iyo shuruucda u jawaabaya jinsiga ee kor u qaadaya heelitaanka waxbarasho oo siman haweenka iyo gabdhaha. Koordhinta wacyiga ku saabsan muhiimada waxbarashada gabdhaha iyo faa'iidooyinka sinnaanta jinsiga ee waxbarashada.
- Bixi Adeegyo Taageero Waxbarasho:** U fidii adeegyo taageero waxbarasho, sida deeqo waxbarasho, barnaamijyo latalin, iyo adeegyo cashar si haweenka iyo gabdhaha loogu awood siiyo inay ka gudbaan caqabadaha waxbarashada oo ay gaaraan guulo waxbarasho.
- Fuulinta Isgaarsiinta Bulshada:** Fuulinta isgaarsiin bulsheed iyo oololayaal wacyi galin ah si loo xoojiyo qiimaha waxbarashada haweenka iyo gabdhaha, loona caqabad galiyo caadooyinka iyo fikradaha jinsiga, loona abaabuulo taageerada waxbarashada gabdhaha heerka bulshadda.

## Lamaane Caalami ah:

- Taageerida Mashaariicda Waxbarashada:** Bixiinta taageero farsamo iyo mid dhaqaale mashaariicda waxbarashada ee yoolka u ah hagaajinta heelitaanka waxbarasho tayadeeda sarreyso oo loogu talagalay haweenka iyo gabdhaha Itoobiya. Maalgalinta barnaamijyo ka jawaabaya baahiyaha gaarka ah ee bulshooyinka lagu takooray iyo kuwa nugul, oo ay ku jiraan gabdhaha miyiga ah, gabdhaha naafada ah, iyo gabdhaha ka tirsan kooxaha qowmiyadaha hoose.
- Koor u Qaadida Sinnaanta Jinsiga ee Waxbarashada:** Ku darida mabaadi'da sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenka barnaamijyada waxbarashada iyo siyaasadaha, iyada oo diiradda la saarayo in la baabi'yo farqiga jinsiga ee heelitaanka, kusugnaant, iyo heerarka dhameystirka waxbarashada.
- La Shaqeynta Dhisidda Awoodda:** iskaashiga ururada maxalliga ah iyo hay'adaha dawladda si loo dhiso awoodda nidaamka waxbarashada iyo hay'adaha, oo ay ku jiraan tababarka macallimiinta, hoormarinta manhajka, iyo kormeerka iyo qiimeynta, si loo huubiyo in la raaco hababka waxbarashada ka jawaabaya jinsiga iyo kuwo iswaafaqsan.

## Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga (SGBV) iyo Amniga

### Dowladda

- Xoojinta Helitaanka Cadaaladda:** Koor u qaadida ka jawaabinta kiisaska Xadgudubka qaab ay Kudheehan caadaalada Jinsiga iyada oo la dhiisayo maxkamado khaas ah, bixinta tababaro koor loogu qaadayo aqoonta saraakiisha fulinaya sharciga iyo xirfadlayaasha sharciga si ay u fahmaan hababka jinsiga ku saleysan, iyo xaaqijinta uu adeegida dhibanayaasha qaab hufan oo cadaalad kudheehan sii ay uu helaan adeegyo ay kujiirto gagaarka sharciga sida in loo qabta qareen lagana caawiyo dhinaca sharciga, gaar ahaan waqtiiga laga baxo coolada lagujiro waqtiiga cadaalada ku meelgaarka ah, ka dib khilaafka. Si loo xaaqijiiyo heelista cadaaladda dhibanayaasha lagu Xadgudubay qaab Ku Saleysan kala sociida Jinsiga, in la dadajiiyo howlaha sharcieed sii loo heelo cadaalad dagdag ah iyo xoojinta dadaallada fulinta sharciga. Tani waxay ka mid tahay tababaro khaas ah oo loogu talagalay shaqaalaha iyo abuurista qaybo gaar ah oo ka mid ah hay'adaha fulinta sharciga si ay si dagdag ah oo wax ku ool leh oga jawaabaan Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga. Gaar ahaan, waxaa loo baahan yahay in la adkeeyo loona dhiso xarumaha hal-meel ah iyo in la sameeyo fursado badan ay kuheelaan guriyo ammaan ah, iyo sidoo kale in la dhiirigaliyo matalaadda haweenka ee udooda Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga.
- Dhiirrigelinta Barnaamijyada Ka Hortagga:** Hoormarinta iyo hirgalinta barnaamijyo ka hortag ah oo hufeeyan oo wax ka qabta sababaha aasaasiga ah ee Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga, caqabado u diraya caadooyinka jinsiga ee waxyeellada leh iyo sawirada qaldan, iyo kor u qaadida sinnaanta jinsiga iyo xiriirada ixtiraamka.
- Ballaadhinta Adeegyada Taageerida iyo taakuleenta:** Kordhinta maalgalinta iyo kheyraadka lagu talagalay adeegyada taageerada ee dhibanayaasha Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga oo ay ku jiraan , ciwaano taleefanka oo dagdag ah oo lagu talagalay inay ka so haadlan dhibanayaasha, la-talin, iyo taageero caafimaad iyo nafsaniyadeed.

## Ururada aan dowliga ahayn (NGOs) & Ururada Bulshada Rayidka ah (CSOs)

- Kor u qaadida Wacyiga:** in la sameeyo ooloola wacyigelin si looga wacyigeliyo bulshada faafitaanka iyo cawaaqibka xadgudubka jinsiga, in la sameeyo dhiirigaliinta dhibanayaasha laguna taakuleeyo heelista taageero, iyo abaabul dhiinaca bulshada si ay tallaabo u qaadaan oo looga hortago harqaladaaha lagu haayo duumarka.
- Bixinta Taageero iyo dhaqdhaqaaq:** Bixiinta adeegyo taakuuleeya dhibanayaasha lagu haayo Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga (SGBV) , oo ay kamiidtahay la-talinta iyo caawiinta sharciga, iyo meelaha amniga leh, iyo u-dhaqaaq xuquuqda iyo baahiyaha dhibanayaasha heerar maxalli, qaran, iyo caalami ah. Dhiirigeli hirgelinta siyaasadda Cadaaladda Kumeelgaarka ah.
- Ka Qaybgelinta Ragga iyo Wiilasha:** Ku dhiirigaliinta ragga iyo wiilasha inay noqdaan ciidanka la dagaalka ka dhanka ah Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga (SGBV) iyada oo loo marayo barnaamijyo waxbarasho iyo wacyigalin oo kor u qaadaya garaadka ragga aragtiida wanagsan, sii loo badalo ficiilada caqabad ku ah caadooyinka jinsiga ee waxyeellada leh, iyo dhiirigalinta ragga inay ka hadlaan harqaladaaha. In la sameeyo Dhiirigalinta ooloolaha arrimaha jinsiga lagu daro nidaamka waxbarashada.

## Saamiyeyaasha Caalamiga ah:

- Bixi Taageero Farsamo iyo Maaliyadeed:** Bixi caawimaad farsamo iyo taageero maaliyadeed si loo xoojiyo nidaamyada jawaabta Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga (GBV) ee qaranka, oo ay ku jirto dhisida awoodda hay'adaha dawladda, ururada bulshada rayidka ah, iyo bixiyayaasha adeegyada. Bixi adeegyo dadka ku nool xeryaha IDP ee ay saameeyeen GBV.
- Xoojinta Iskaashiga:** Dhisida iskaashiyada iyo wada-shaqeyn u dhexeeya dowlada, ururada bulshada rayidka ah, iyo hay'adaha caalamiga ah si la isku dubarido dadaallada, lana wadaago hababka ugu fiican eel aga heelo khibradaha, iyo lana koordhiyo kheyraadka lagu talagalay ka hortagga iyo jawaabta GBV.
- Dhiirigalinta Isbadal Siyaasadeed:** U-dhaqdhaqaaq isbadallo siyaasadeed heer qaran iyo heer caalami si loo hormariyo ka hortag iyo ujawaabid GBV, loona qoondeeyo kheyraad ku filan, iyo in dowladaha lagu dabagalo wax ka qabashada GBV. Taageerida hirgalinta siyaasada cusub ee lagu fulinayo cadaaladda kumeelgaarka ah ee la ansixiyay.

## Daryeelka Maskaxda iyo Nafta

### Dowladda

- Maalgalinta Kaabayaasha Caafimaadka daryeelka Maskaxda:** U qoondeenta kheyraadka ballaarinta xarumaha caafimaad ee maskaxda iyo adeegyadooda, gaar ahaan meelaha miyiga ah ee aan si wanaagsan loo adeegsan, si loo hubiyo in dhammaan dumarku helaan adeegyada.
- Hirgalinta Siyaasadaha Caafimaadka Maskaxda:** Sameenta iyo hirgalinta siyaasada kuwajahaan wacyigalinta caafimaadka maskaxda, waxbarashada iyo barnaamijyada taakuleenta, iyada oo looga dhax faaideeyanayo nidaamyada caafimaadka ee hadda lagu shaqeenayo. Bixiinta tababarro iyo adeegyo latalin ku saabsan boogdhawiida xanuunada maskaxda, gaar ahaan degaanada Tigay, Amxaarada, iyo BGRS. Wax ka qabashada caqabadaaha.
- Bulshada iyo Dhaqaalaha:** Hirgaliinta siyaasado dhaqaale iyo mid bulsho oo wax ka qabta caqabadaaha ogu waaweyn ee cilmi-baaristu tilmaantay, sida shaqo la'aanta iyo xasillooni darada dhaqaale, si looga yareeyo culayska caafimaadka maskaxda ee dumarka. Taageer dhisidda xarumo dib-u-habeeyn buuxa oo leh xarumo loogu talagalay dumarka iyo meelaha badbaadada leh oo leh adeegyo isku xidhan; Adkeenta iyo ballaarinta adeegyada talo-bixinta, (mid shaqsi, mid kooxeedka iyo dhamaan bulshada), si looga boogadhayo dumarka iyo bulshada ka naxday dhibaatooyinka.

## Hay'adaha Samafalka & Hay'adaha Bulshada Rayidka ah (NGOs & CSOs):

- A. **Bixiinta Adeegyo Taageero Caafimaadka Maskaxda:** in la Sameeyo adeegyo taageero caafimaadka maskaxda oo ku saleysan bulshada, oo ay ku jiraan talo-bixin, daawayn, iyo kooxo taageero ah, si loo siiyo dumarka daryeel caafimaad oo la heeli karo oo ku habboon dhaqankooda. In mudnaanta hoore lasiiyo degaanada coolaadu ragaadisay sida Tigray, Amxaarada, BGR, iyo bulshooyinka qaybo ka mid ah Oromada;
- B. **Udhaqdhaqaaqia Xuquuqda Caafimaadka Maskaxda ee Haweenka:** U dhaqdhaqaaqida siyaasadaha iyo barnaamijyada mudnaanta siinaya xuquuqda caafimaadka maskaxda ee haweenka, oo ay ku jiraan hindisayaasha wax looga qabanayo caqabadaaha gaarka ah ee ku saleysan jinsiga iyo dhiirrigalinta daryeelka caafimaadka maskaxda ee ku habboon jinsiga.
- C. **Koordhinta Wacyigalinta:** dyaarinta fagaara oololayaal wacyigalin iyo aqoon isweydaarsiyo waxbarasho si loo yareeyo waxyeelada la xiriirta dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda iyo in dumarku helaan gargaar marka loo baahdo.

## La-hawlgalayaasha Caalamiga ah

- A. **Fidiinta Taageero Farsamo iyo Mid Dhaqaale:** Bixinta kaalmo farsamo iyo mid dhaqaale si loo xoojiyo kaabayaasha caafimaadka maskaxda iyo dadaallada koobciinta awoodda gudaha Itoobiya, gaar ahaan meelaha miyiga ah, bulshooyinka la diib u dhacay iyo goobaha dagaalada ka soo kabanaya sida Tigray.
- B. **Kobcinta Awoodda:** Taageer hindisayaasha kobcinta awoodda ee xirfadlayaasha caafimaadka maskaxda gudaha, oo ay ku jiraan barnaamijyo tababar, aqoon isweydaarsiyo, iyo isweedaarsiga khubaro kale oo caalami ah.
- C. **Cilmi-baaris iyo Ururinta Xogta:** Taageer cilmi-baarista iyo dadaallada xog ururinta si loo fahmo baahiyaha caafimaadka maskaxda ee haweenka Itoobiya loona dajiyo faragelinno iyo siyaasado ku saleysan caddayn.

## Helitaanka-Caddaaladda

### Tallaabooyinka Dawladaha:

- A. **Xoojinta qaab-dhismeedka sharciga iyo hababka xallinta khilaafaadka:** iyada oo la diiradda la saarayo waxyaabaha la xiriira dhulka, fuurniinka, iyo xuquuqda hantida ee si aan sinnayn laqeedsado saameeya haweenka.
- B. **Kordhiinta heelitaanka adeegyada sharciga iyo barnaamijyada caawimaada sharciga,** gaar ahaan meelaha miyiga ah ay haweenku ay la kulmaan caqabado badan oo ku aaddan heelitaanka cadaaladda. Maalgelinta tababarka iyo barnaamijyada kor u qaadista awoodda ee xirfadlayaasha sharciga iyo dhex-dhexaadiyayaasha bulshada si loo xaqiijiyo awooda dumarka u leeyihiin sharciiga. in si hufan loo maareeyo kiisas la xiriira xuquuqda haweenka.
- C. **Aasaasida maxkamado gaar ah ama hay'ado:** si ay u qaadaan kiisaska ku saleysan tacadiga jinsiga ku saleysan iyo noocyada kale ee takoorka ka dhanka ah haweenka, iyada oo la xaqiijinayo heelista caddaalad dagdag ah kareeban eex. Xoojinta awoodda baadhayaasha booliiska ee baaritaan ku sameeya kiisaska Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga(GBV) ah, abaabulka fadhiiyo maxkamadeed gaar ah oo loogu talagalay kiisas Xadgudubka Ku Saleysan Jinsiga(GBV)ah, iyo/ama qolalka sugitaanka.

## Hay'adaha Samafalka & Ururada Bulshada Rayidka ah (NGOs & CSOs)

- A. **In la Bixiiyo barnaamijyo wacyigalin sharciga iyo waxbarasho:** si haweenka loo wargaliyo xuquuqda iyo xaalalka sharciga ee ay xaaq uleeyihiin; U oololeenta dib-u-habeeynta siyaasadda iyo hagaajinta nidaamka caddaaladda si loo xaliyo caqabadaha saldhigtay iyo eexda ka caqabada ku nooqotay in haweenku helaan caddaalad. U oololeeynta in qaab-dhismeedyada haweenka, haweenka badbaaday iyo dhibbanayaasha ay si firfircoon oga qayb qaataan oo ay ka faa'iidaan siyaasadda Caddaaladda Kala-guurka iyo geeddi-socodkeeda.
- B. **Dhiisida nidaam diib u heeshisin iyo xaalinta khilaafaadka** oo ku salaysan bulshada kuwaas oo mudnaanta siiya baahiyaha iyo danaha haweenka, iyaga oo xaqiijinayo ka-qaybgal muuqda ee haweenka.

## Lammaanayaasha Caalamiga ah

- A. **In la Taageero mashaariicda lagu xoojinayo sharciga iyo hoormariinta nidaamyada caddaaladda ee ku saleysan jinsiga ee Itoobiya,** oo ay ku jiraan caawinta farsamada iyo barnaamijyada koobcinta awoodda.
- B. **Maalgelinta mashaariicda bixisa gargaarka sharciga iyo adeegyada taageerada haweenka,** gaar ahaan kuwa ku nool miyiga iyo bulshooyinka la heyb-sooco, si loo wanaajiyo he elitaankooda caddaaladda. In la Wada-shaqeeyo la-hawlgalayaasha maxalliga ah si loo kormeero loona qiimeeyo waxtarka barnaamijyada gargaarka sharciga iyo hababka xallinta khilaafaadka, iyada oo la aqoonsanayo meelaha u baahan in la hagaajiyo iyo hababka ugu wanaagsan ee la soo celin karo.

## Siyasadda iyo Ka Qaybgalka Bulshada

### Dowladda:

- A. **Hagaajinta Barnaamijyada Aqoon-is-weydaarsiga Sharciga:** Hirgaliinta barnaamijyo hufan oo aqoon-is-weydaarsiga sharcig a si kor loogu qaado wacyigalinta haweenka ee sharciyada iyo siyaasadaha, gaar ahaan meelaha aan si weyn loo aqoon sida Sharciga Shaqada. Bixi macluumaad la heeli karo oo ku habboon dhaqanka iyada oo loo marayo oololayaasha wacyigelinta bulshada iyo barnaamijyada waxbarashada.
- B. **Kor u Qaadida Wakiilada Haweenka ee Siyaasadda:** in la Hirgeliyo siyaasadaha falanqaynta ee koor uqaadaysa wakiilada haweenka ee garaadka hogaamineed ee siyaasadda dhammaan heerarka dowladda. In la Sameeyo kootada jinsiyeed ee nidaamka doorashada si loo xaqiijiyo wakiilo haweenk cadaali ah oo ka dhex muuqda goleyaasha go'aaminta
- C. **Xaqiijinta Ka Qaybgalka Doorashada:** Xoojinta geedi socodka doorashada si loo dhiirrigeliyo loona fududeeyo ka qaybgalka haweenka ee doorashooyinka. In la shaqeeyo caqabadaha aagabka sida dib u dhac ku yimaada heelitaanka kaararka codbixinta oo bixiya talaabooyin amni si loo yareeyo cabsi ku saabsan rabshadaha goobaha codbixinta.



## Hay'adaha Bulshada Rayidka ah:

- Koordhinta Ka Qaybgal Siyaasadeed ee Haweenka:** Xoojinta tababarka iyo barnaamijyada awood-siinta si haweenku si hufan oga qaybqaataan geeddi-socodka siyaasadeed. Bixiinta tababar hogaamineed, horumarinta xirfadaha u doodista, iyo barnaamijyo latalin ah si loo siiyo haweenka agabka lagama maarmaanka u ah in ay si hufan uga dhax muuqdaan meelaha siyaasadda.
- Kor u Qaadista Ogaanshaha Xuquuqda Haweenka:** in la diyaariyo oololayaal lagu qabanayo fagaara wacyigalin iyo aqoon-is-weydaarsiy bulshadeed si loo xuujiyo wacyigalinta xuquuqda haweenka, lagu barayo xuquuqda ay leeyihiin ee Dastuuriga ah ee ku qoran dastuurka Itoobiya iyo shuruucda khuseeya. Dhiirigeli fal-celinta hoose iyo dadaallada u doodista si loo xoojiyo codadka haweenka loona horumariyo sinnaanta jinsiga.
- Xoojinta Waxbarashada lahaanshaha Muwaadinimada:** Wada shaqee hay'adaha dowladda iyo dhinacyada kale si loo xoojiyo barnaamijyada waxbarashada muwaadinimada, iyadoo diiradda la saarayo xuquuqda haweenka, waajibadka muwaadinka, iyo habraacyada doorashada. Ku dhiirigali ragga inay saameeyaan dhaqan siyaasadeed iyo aragtida ku saabsan ka qaybgalka haweenka ee siyaasadda.

## Baahwadaagta caalamiga

- Taageerida koor uqaadida ka qaybgalka siiyaasada haweenka:** Baahwadaagta caalamiga waxa looga bahanyahay caawinta haweenka dhiinaca maaliyada iyo xiirfadaha sii ay koor uqaadaan ka qaybgalkooda siiyaasadeed. Islamarakhana u sameeyaan tababarro lagu taageerayo haweenka sii koor loo qaado garaadkooda hoogaamineed, fahaanka nidaamka dorashooyinka, iyo olalaaha uruurada haweenka dhinaaca ka qaybgalka haweenka kamid noqoshadaa xukuumada.
- Olalaaha barnaamijyada ariimaha haweenka:** Baahwadaagta caalamiga wa inay u olaleeyaan hiirgalinta barnaamijyada ariimaha haweenka iyo in lagu daro bayaanada lagu hirgalinayo gudahaan her wadan iyo degaanada. In lagu daro halbeeg lagu caabiro fuulinta barnaamijyada ariimaha haweenka. Baahwadaagta caalamiga wa inay ku taageeran haweenka sii loo hoormariyo ka qaybgalka haweenka ee siiyaasada ama loo abuurto tiixgalin gaar ah ay ka heelikaran doorashooyinka iyo golayaasha wakiilada.
- Dabagal iyo qiimeeyn nidaamka dorashooyinka:** Baahwadaagta caalamiga wa inay ku cawiiyan haweenka sii loo dabagalo iyo la qiimeeyo nidaamka dorashooyinka gaaar ahaan ka qaybgalka iyo tiixgaliinta gaarka la siiyay haweenka, waxa loo bahaanyahay Baahwadaagta caalamiga inay koor uqaadaan xiirfada kudhaqamiida cadcadaanta iyo qaadista masuuliyada. Midaas waxa lagu hiirgalin kara tusaale koor u qaadista tabartooda dhaqaale iyo taakuleenta goobjoogayaasha madax banaan ee dorashooyinka ee sii gaar ah u qiimeeya ka qaybgalka haweenka iyo dabagalka heelinta haweenka tiixgalinta gaar ah ee dorashooyinka.

## Nabadgaliyo iyo Ammaan

### Tallaabooyinka Dawladaha:

- Tallaabooyinka Dowladda Kor u Qaada Nabadgaliyada iyo Amniga:** Xoojinta dadaallada lagu hoormarinayo nabadgaliyada iyo amniga dalka iyada oo loo marayo hababka xalinta khilaafaadka, mashaariicda dhisidda nabadgaliyada, iyo madasha diwaangalinta bulshada. In la Maalgaliyo barnaamijyada ka hoortaga iyo xalinta khilaafaadka ee wax ka qabta caqabadaaha qootadheer ee khilaafaadka iyo kor u qaadida is-dhexgalka bulshada, gaar ahaan deegaanada ay coolaada saameeysay. In muudnaanta hoore lasiiyo Amhara, Benshangule Tigray, iyo Gambella iyo qaar ka mid ah degaanada Oromia ee coolaadu ragaadisay.
- Kudariista haweenka dhammaan geeddi-socodka nabadda,** wada hadalka, iyo mashaariicda sii loo xaqiijiyo doorka duumarka iyo la ogaado sameeynta ay kuyeelan karaan dumarka. Hirgalinta barnaamijyaasha siyaasada si loo abuurto fursado shaqo oo badan loona xaqiijiyo heelitaanka waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka, iyada oo laga laga miidhadhaliinayo walaacyada muhiimka ah ee haweenka soo jeediyeen. Maalgalinta hoormarinta kaabayaasha dhaqaale, gaar ahaan maalgalinta so saarinta biyaha nadiifka ah, waddooyinka, iyo xaarumaha daryeelka caafimaadka, si loo adkeeyo amniga iyo iskufilnashaha baahida aasaasiga bulshada. In la Sameeyo xeelado dhameystiran oo lagaga hoortago loogana jawaabo xadgudubka ku saleysan jinsiga (GBV), oo ay ka dhax muuqdaan koor u qaadida adeegyada taageerada, oololayaasha wacyigalinta, iyo dib-u-habeynta sharciyada si loo ilaaliyo xuquuqda haweenka.

## Hay'adaha samafalka iyo Hay'adaha Bulshada Rayidka ah

Wa inay Fuduudeeyaan mashaariicda dhisidda nabadgaliyada ee ku saleysan ka qaybgalka bulshada, oo ay ku jiraan barnaamijyada xalinta khilaafaadka iyo dib-u-heshiisiinta, si loo xalliyo xasaradaha aasaasiga ah loona hoormariyo is-dhexgal buulsheedka ila heerka hoose. Ku lug yeeshan haweenka sii loo heelo ka qaybgalayaal firfircoon ee dadaallada dhisidda nabadgaliyada, iyaga oo ka faa'iidayanaya doorkooda iyaga oo utaagan doodista nabadgaliyada iyo hogaamiyaal bulsho. Bixi tababaro iyo taageero si loo awood-siiyo haweenka inay ka qaybqaataan dadaallada dhisidda nabadda iyo inay u doodayaan xuquuqdooda heerka maxalliga ah iyo kan qaran.

Samee shabakad taageero iyo meelaha badbaado ee haweenka ay saameeyeen khilaafaadka hubeysan ama rabshadaha, iyada oo la siinayo talo-bixin, caawimaad sharci, iyo caawimaad dhaqaale si loo xoojiyo adkeysigooda iyo soo kabashadooda

## Shirakada Caalamiga ah:

Bixinta taageero farsamo iyo mid dhaqaale oo ku saabsan mashaariicda dhisidda nabadda iyo xalinta khilaafaadka ee Itoobiya, adigoo diiradda saaraya dhisidda awoodda falalka nabadeed ee maxalliga ah, fududeynta geeddi-socodka wadhadallada, iyo horumarinta hababka dhisidda nabad loo dhan yahay. Sii taageero farsamo iyo mid dhaqaale si loo taageero dadaallada dowladda iyo bulshada rayidka ah ee ku aaddan horumarinta nabadda, amniga, iyo sinnaanta jinsiga ee Itoobiya.

Maalgalint barnaamijyo ujeedkoodu yahay horumarinta helitaanka haweenka ee waxbarashada, daryeelka caafimaadka, iyo fursadaha dhaqaale, iyadoo wax laga qabanayo sababaha aasaasiga ah ee amni-darrada iyo rabshadaha. Taageer barnaamijyada dhisidda awoodda si loo xoojiyo hay'adaha maxalliga ah loona awood-siiyo haweenka inay ka qaybqaataan geeddi-socodka go'aan ka gaarista ee la xiriira nabadda iyo amniga heer kasta.

# Tixraacyada

**Central Statistical Agency (CSA) [Ethiopia] and World Bank. 2018.**  
Ethiopian Socioeconomic Survey 2017/18. Survey Report.  
Addis Ababa, Ethiopia.

**Central Statistical Agency (CSA) [Ethiopia] and ICF. 2016. Ethiopia**  
Demographic and Health Survey 2016.  
Addis Ababa, Ethiopia, and Rockville, Maryland, USA: CSA and ICF.

**Creswell, J. W., & Creswell, J. D. (2017).**  
Research design: Qualitative, quantitative, and mixed methods approach.  
Sage publications.

**Ethiopian Statistics Service (ESS) [Ethiopia] 2021.**  
Labour and Migration Survey Key Findings.  
Addis Ababa, Ethiopia.

**The Federal Democratic Republic of Ethiopia (2019), Fifth National Report on Progress made in the Implementation of the Beijing Declaration and Platform for Action (Beijing +25).**  
Document available at <https://shorturl.at/3JsU3>

**IFPRI. (2012).**  
WEAI Resource Centre available at <http://weai.ifpri.info/> .  
Retrieved on August 15, 2020.

**World Economic Forum. (2019).**  
Global Gender Gap Report 2020.



NETWORK OF  
ETHIOPIAN WOMEN'S  
ASSOCIATIONS

Tel: +251118217758  
email: [newaethiopia@gmail.com](mailto:newaethiopia@gmail.com)  
[www.newaethiopia.org](http://www.newaethiopia.org)



# GO'AAMINTA HEERKA IYO MUDNAANTA HAWWEENKA ITOOBIYA

**Warbixinta Daraasad**  
*[Kooban]*



የሴቶችና ማህበራዊ ጉዳይ ሚኒስቴር  
Ministry of Women and Social Affairs



Funded by  
the European Union



NEWA



OXFAM